



# BUUGGA TUSMADA DARAWALKA

KU DHAQANKA SHARCIYADA GAARIYAASHA



[BMV.OHIO.GOV](http://BMV.OHIO.GOV)

DECEMBER 2022



## XOG KU SAABSAN BUUGAAN TUSMADA AH

Ohio Bureau of Motor Vehicles (BMV, Laanta Gaariyaasha Matoorka ku shaqeyaa ee Ohio) ayaa kormeerta ruqsadaynta iyo diiwaan gelinta darawalka iyo gaariga iyo adeegyo kale. Waxaan ku dedaalaynaa inaan ka dhigno khibrada aad kala kulanto BMV mid raaxo badan oo hufan.

BMV waxay ku siinaysaa Buuga Tasmada Darawalka ee Ohio oo ah hagaha waxbarashada ee dadka u baahan Ruqsada Darawalnimada ee Ohio, ee uu sharcigu qasab ka dhigaayo si gaari matoor ku shaqeyaa loogu wado Ohio, wuxuuna tilmaan ka bixinayaa sharciyada gaariyaasha. Tasmadaan keliya ayaan lagu dabooli karin dhammaan sharciyada gaariyaasha quseeya.

Tasmada Darawalka ee Ohio waxay sharxaysaa hanaanka guud ee qaadashada Ruqsada Darawalka waxayna xog guud ka bixinaysaa sharciyada iyo xeerarka gaari wadista badqabka leh. Tusmadu badel uma ahan, kamana kor marayso, Xeerka Cusub ee Ohio ama Xeerka Maamulka ee Ohio. Xogta ku qoran tasmadaan waa isbadeli kartaa.

**Tasmada Darawalka ee Ohio** ayaa laga heli karaa webseedka BMV ayadoo ku qoran luuqadaha Ingiriisiga, Af-Soomaali, Isbaanish, far waawayn (Ingiriis), iyo cod (Ingiriis).

Adeegso lifaaqa lagugu siiyay tasmada si aad u hesho ilaha xogta dheeraadka ah.

*Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada BMV ee Ohio, booqo webseedka BMV oo ah [www.bmv.ohio.gov](http://www.bmv.ohio.gov).*



## ADEEGYADA OONLAYNKA AH

- Samee imtaxaanka hubinta aqoonta
- Mudayso imtaxaanka darawalka
- Boos ka qabso laynka loogu jiro Ku xigenka madaxa Diiwaan gelinta ee Wakaalada Ruqsada
- Cusbooneysii ama dib u daabac Ruqsadaada Darawalka ee Ohio ama Kaarka Aqoonsiga\*

*\*Qarash ayaa lagaa qaadayaa*



## MAWDUUCYADA

### QAYBTA 1: SIDA AAD KU HELAYSO RUQSADAADA DARAWALNIMADA

Baaritaanka Araga iyo Imtaxaanka Aqoonta .....	1
Kaarka Aqoonsiga Ruqsada Ku Meelgaarka ah (TIPIIC) .....	2
Shuruudaha Waxbarashada Darawalka ee (Dadka Kayar 18 Sano Jir) .....	3
Gaadiidka Mootada ee Ohio .....	3

### QAYBTA 2" KAHOR INTAADAN GAARI WADIN

Kormeerida Gaarigaaga .....	4
Booska Darawalka: Wax ka Badelka Kursiga iyo Muraayada .....	5
Xadidaadaha Badqabka .....	6

### QAYBTA 3: FEEJIGNOOW

Aragga .....	7
Daalka .....	7
Gaari u Wadista Xad Dhaafka ah .....	7
Gaari wadista adoo Wax Kale ku Mashquulsan .....	7
Khamriga, Daroogada, iyo Gaari Wadista .....	8

### QAYBTA 4: XEERARKA WADADA

Xadiyada Xawaaraha .....	9
Xaqa Wadada .....	10
Digniinaha Wadada .....	10
Calaamadaha Wadada .....	11
Calaamadaha Laymanka Wadada .....	13
Laynka Dhanka Bidix Keliya loo Leexan Karo ee Wadada Labada Jiho ah .....	14
Meesha Dadku ka Gooyaan Wadada .....	14

### QAYBTA 5: BARASHADA GAARI WADISTA

Kicinta Gaariga .....	15
Kaxaynta Gaariga .....	15
Joojinta Gaariga .....	15
Isteerinka .....	16
Gadaal u Kaxaynta Gaariga .....	16
Isgoysyada iyo Leexashada .....	16
Afar Irdoodiyada ama Wareegyada Wadada .....	18
Marista Laynka Wadada .....	18
Badelida Laymanka .....	19
Gelista Wado wayn oo Laymanka Badan .....	19
Ka bixista Wadada Wayn .....	19
Baasida .....	20
Isgoyska Wadada Tareenka .....	21
Ka Istaagida Baska Dugsiga .....	22
Baarkinka .....	23

### QAYBTA 6: SHARCIYADA GOBALKA IYO GANAAXYADA

Caymiska - Masuuliyada Dhaqaale .....	24
Khamriga, Daroogada, iyo Gaari Wadista .....	24
Ganaaxyada .....	26
Iska Laadlaadinta Dhinaca Gaadhiga .....	27
Sharciyada Xadidaadaha/Badqabka Gaariga Sida Ilmaha .....	27

### QAYBTA7: XAALADAHA GAARI WADISTA EE GAARKA AH

Joogsiyada Booliiska iyo Taraafiga .....	28
Marka aad Isticmaalayso Nalalka Gaariga .....	28
Gaari Wadista Habeenkii .....	28
Wadista Gaariga Xili ay Ciiryaamo	
Kacsan Tahay .....	29
Wadista Gaariga Xiliga Qaboobaha .....	29
Aagaga Shaqada .....	29

### QAYBTA 8: TILMAAMAHA GAARI WADIS AMAAN AH

Eegista Aaga .....	30
Maaraynta Xawaaraha .....	30
Maaraynta Meesha Banaan .....	31
Wada Hadalka .....	32
Kahortaga Dhaawaca ka Dhasha Gaariyaasha Kulul .....	33

### QAYBTA 9: WADAAGISTA WADADA

Dadka Lugaynaaya .....	34
Wadeyaasha Mootooyinka .....	34
Wadeyaasha Baaskiilada .....	35
Gaariyada Ganacsiga .....	36
Gaariyada Gurmada Degdega ah (Booliiska, Dab damiska, Gaariyada Caafimaadka) .....	38
Sharciyada Joogsiga .....	38
Gaariyada Tartibta u Socda .....	38

### QAYBTA 10: XAALADAHA DEGDEGA AH

Iska Ilaalinta Shilalka .....	39
Cilada Gaariga .....	40
Marka Shil Dhaco .....	41

### QAYBTA 11: QAADASHADA IMTAXAANKA DARAWALKA

Imtaxaanka Darawalnimada iyo Xirfadaha Wadada .....	42
Koorsada Tababarka Gaari Wadista ee Dadka waawayn ee Lasoo Gaabshay .....	44

### QAYBTA 12: IIBSO RUQSADAADA DARAWALNIMADA

Iibsi Ruqsadaada Darawalnimada .....	45
Cusbooneysiinta Ruqsadaada Darawalka .....	47
Casharada Ruqsada Darawalka .....	47

### QAYBTA 13: MAXAA KALE OO AY TAHAY INAAN OGAADO?

Dadka Cusub ee soo Degaaya Ohio .....	50
Sanduuqa Badbaadi Arageena .....	50
Sanduuqa Diiwaanka Ku Deeqida Xubnaha Jirka iyo/ Fursad Labaad .....	50
Diiwaan Gelinta Codbixiyaha .....	50
Kaarka Aqoonsiga Ilmaha .....	50
Qofka xiga ee masuul kaa Noqon kara – Xiriirka Xaalad Degdeg ah .....	51
Dardaranka Dhaxalka ee Qofka Nool .....	51
Aqoonsiga Ciidanka Qalabka Sida .....	51

**QAYBTA 1: Sida aad ku Helayso Ruqsadaada Darawalnimada**

- Akhri tusmadaan gabi ahaanteedba
- Soo aruurso dukumiintiyada cadaynta aqoonsiga adoo adeegsanaaya [Liiska Dukumiintiyada la Aqbali karo](#)
- Akhri tusmadaan si aad ugu baasto imtaxaanka aqoonta (Arag qaybaha 2 ilaa 10)
- Qaado Kaarka Aqoonsiga Ogolaanshaha Ku Meel gaarka ah (TIPIIC) (ka fiiri bogga xiga)
- Haddii aad ka yar tahay 18 sano, dhamayso koorsada tababarka waxbarashada iyo dhammaan saacadaha gaari wadista ee lagaa rabo.
- Mudayso oo ku baas imtaxaanka darawalnimada (gaari wadista iyo imtaxaanaadka xirfadaha wadada) (Ka fiiri Qaybta 11)
- libso Ruqsadaada Darawalka \*Ka fiiri Qaybta 12)

**QAYBTA 1:**

- BAARITAANKA ARAGGA IYO TIJAABADA AQQONTA
- KAARKA AQQONSIGA RUQSADA KU MEEL GAARKA AH (TIPIIC)
- SHURUUDAHA WAXBARASHADA DARAWALKA EE DADKA KAYAR 18 SANO JIR
- GAADIIDKA MOOTADA EE OHIO

**BAARITAANKA ARAGGA IYO IMTAXAANKA AQQONTA**

Markaad gaarto da'da 15 sano iyo lix bilood, waxaad buuxinaysaa shardiga ugu yar ee da'da si aad u marto baaritaanka araga iyo imtaxaanka aqoonta,

**Baaritaanka Araga**

Waa qasab inaad buuxiso heerarka loo asteeyay araga kahor intaadan qaadan Ruqsada Darawalka. Haddii aad xirato ookiyaale ama muraayadaha araga, soo qaado. Xadidaadaha gaari wadista ayaa lagu saari karaa ayadoo lagu salaynaayo natiijooyinka baaritaanka araga.

**Imtaxaanka Aqoonta.**

Baro oo fahan dhammaan xogta ku qoran tusmadaan si aad u gasho imtaxaanka aqoonta. Adeegso [Imtaxaanka Aqoonta Tusaalaha ah](#) ee oonlaynka ah si aad u aragto sida su'aalaha la isku waydiiyo. Imtaxaanka waxaa ku jira 40 su'aalood oo kuwa dookhyada badan ah (ayadoo lagaa rabo inuu ku baasto 75%\_ wuxuuna ku baxayaa Carabi, Jayniis, Ingiriisi, Faranji, Jabaaniis, Af-Ruush, Soomaali, iyo Isbaanish. Waxaad adeegsan kartaa turjumaankaaga gaarka ah ee dhammaan luuqadaha kale adoo balan ka qabsanaaya [Xarunta Imtaxaanka Darawalka](#) oo keliya.

- Haddii aad baasto - Tag [Wakaalada Ku xigeenka Diiwaan geliyaha Ruqsadaha](#) si aad u soo iibsato Kaarka Aqoonsiga Ruqsada Ku Meelgaarka ah (TIPIIC) 60 maalmood gudahood kadib marka aad imtaxaanka ku baasto (ka fiiri xogta TIPIIC bogga xiga).
- Haddii aad ku fashilanto - waa inaad sugtaa hal maalin kahor intaadan ku celin imtaxaanka. Ma jiro xadi u degsan inta jeer ee aad geli karto imtaxaanka aqoonta, laakiin keliya halmar ayaad geli kartaa maalin kasta.

Imtaxaanka Aqoonta ayaa lagu heli karaa qaababka soo socda:

- Oonlayn ayaa looga heli karaa [Adeegyada Oonlaynka ee BMV](#).
- Inad toos u tagto [Xarunta Imtaxaanka Darawalka ee BMV](#).
- Inaad toos u tagto [Wakaaladaha Ku Xigeenka Diiwaan hayaha Ruqsada ee BMV](#).

**Caawimaadaha Naafada:**

La xariir [Xarunta Imtaxaanka Darawalka](#) si aad u samayso imtaxaanka aqoonta iyo/ama u hesho adeegyada imtaxaanka darawalka.

## QAYBTA 1: Sida aad ku Helayso Ruqsadaada Darawalnimada

### KAARKA AQOONSIGA RUQSADA KU MEELGAARKA AH (TIPIC) – ORC 4507.05

Marka aad si guul leh u dhamayso baaritaanka aragga iyo imtaxaanka aqoonta, booqo [Wakaalada Ku xigeenka Diiwaan Hayaha Ruqsada](#) 60 maalmood gudahood si aad u soo iibsato TIPIC.

- Haddii TIPIC aan lasoo iibsano 60 maalmood gudahood, waa inaad markale kusoo celisaa baaritaanka araga iyo imtaxaanka aqoonta.
- Codsadeyaashu waa inay keenaan dukumiintiyada ku jira [Liiska Dukumiintiyada la Aqbali karo](#) si ay u cadeeyaan qaybaha soo socda ee aqoonsiga:
  - Magaca sharciga oo buuxa
  - Taariikhda Dhalashada
  - Lambarka Social Security (haddii uu haysto)
  - Caddayn waddaninimo ama degganaansho sharci ah
  - Ciwaanka Wadada Ohio (labo dukumiinti oo sheegaaya ciwaanka ayaa looga baahan yahay si loo helo kaar waafaqsan sharciga federaalka)
- Haddii codsadu ka yar yahay 18 sano waalidka ama masuulka codsada waa inuu la socdaa si uu ula saxiixo codsiga TIPIC.
- Haddii aad haysato kaarka Aqoonsiga Ohio (ID), waa la kansali doonaa marka lagu siiyo TIPIC. Qof dagan Ohio ayaa haysan kara hal ruqsada Darawalka ah ama kaarka aqoonsiga markiiba.

### Xadidaadaha TIPIC

- **Dadka ka yar 16:** Haddii aad ka yar tahay 16 sano, darawalka waa inuu la socdaa waalid, masuul, wakiil, macalinka darawalnimada oo ruqsad leh, ama qof jira 21 sano ama ka wayn, oo noqonaaya *loco parentis*, kaasoo fadhiya kursiga hore ee rakaabka ee ku xiga qofka ruqsad wata.
- **Inta u dhaxaysa da'aha 16 ilaa 17:** Gaari la wadista darawal kasta oo wata ruqsada darawalka, jira da'da 21 ama ka wayn, oo fadhiya kursiga hore ee rakaabka ayaa la ogol yahay, **marka laga reebo** laga bilaabo saqdhexe ilaa 6 a.m. markaas oo ay qasab tahay inuu darawalka la socdo waalid, masuul, ama wakiil haysta Ruqsada Darawalka oo Sax ah.
- **Da'da 18 iyo ka wayn:** Waxay darawalnimada baran karaa keliya haddii uu la socdo darawal ruqsad leh oo 21 sano ama ka wayn jir ah.
- **Da' kasta:**
  - Darawalladu waa inay sitaan TIPIC mar kasta marka ay gaari wadaan.
  - Qofka wayn ee u qalma ee fadhiga kursiga hore waa inuusan khamri cabin.
  - Darawalka iyo dhammaan rakaabku waa inay xidhaan suumanka amaanka.
  - Adeegsiga aalad kasta oo elektaroonig ah waa mamnuuc inta aad gaari wadayso.
  - Wadarta guud ee dadka gaariga saaran waa inaysan ka badan wadarta guud ee suumanka badqabka ee ku xiran gaariga.

## Qaybta 1: Sida aad ku Helayso Ruqsadaada Darawalnimada

### SHURUUDAHA WAXBARASHADA DARAWALKA EE (DADKA KAYAR 18 SANO JIR)

Si uu u helo Ruqsada Darawalnimada, darawalka kayar 18 sano waa inuu buuxshaa shuruudahaan:

- Waa inuu dhamaystaa casharka waxbarashada darawalka ee lagu baxsho dugsiiga darawalnimada oo ruqsad leh uuna qaataa 24 saac oo fasalka uu galaayo ama oonlayn ku baranaayo, iyo 8 saacadood oo waqtiga gaari wadista ah.
- Waa inuu dhamaystaa 50 saacadood oo gaari wadista asagoo ay la socdaan waalid ama masuul, uuna gaariga wadaa ugu yaraan 10 saacadood oo habayn ah.
- Waa inuu sitaa TIPIC ugu yaraan lix bilood.

*Ka fiiri dugsiiga darawalnimada iyo xog dheeraad ah [Tababarka Darawalka ee Ohio](http://www.drivertraining.ohio.gov) ([www.drivertraining.ohio.gov](http://www.drivertraining.ohio.gov)).*

### GAADIIDKA MOOTADA EE OHIO

Qaado ruqsada ama aqoonsiga wadista mootada adoo galaaya imtaxaanka aqoonta wadista mootada ee lagu baxsho Xarunta Imtaxaanka Darawalka ama dhamaysanaaya Koorsada aasaasiga ah ee *Gaadiidka Mootada ee Ohio*. Tasmada [Darawalka Mootada](#) (MOP 0100) ayaad ka helaysaa tilmaan dheeri ah oo aad ku helayso ruqsada sare ee mooto wadista.

*Iska diiwaan geli koorsada tababarka wadista mootada oo xog badan ka ogoow [Motorcycle Ohio](http://www.motorcycle.ohio.gov) ([www.motorcycle.ohio.gov](http://www.motorcycle.ohio.gov)).*

# Motorcycle Ohio

**QAYBTA 2: Kahor Intaadan Gaari Wadin****KORMEERIDA GAARIGAAGA**

Marka laga hadlaayo badqabka wadada, ma xakamayn kartid darawallada kale ama xaaladaha wadada, laakiin waxaad xakamayn kartaa dayactirka gaarigaaga. Xaqiiji in gaarigaagu yahay mid badqab kuu leh adiga iyo dadka rakaabka ah kahor intaadan gaariga wadin.

**Sharciyada Qalabka Gaariga – ORC 4513 iyo OAC 4501:2-1**

Sharciga Ohio ayaa Sheegaaya:

“Waa inuusan qof gaari wadin ama kaxayn, ama uusan sababin ama asagoo og ogolaan in la wado ama lagu kaxeeyo gaari, wado kasta oo wayn gaari kasta ama gaariyaal kaladuwan taasoo aan lahayn xaalad badqab khatarna gelinaysa qof.”

Waxaa intaas dheer, waa inaan gaari lagu xirin ama loo ogolaan in lagu xiro qalab kasoo taagan, cirifyo wax u mudaaya oo jaban, ama qaybaha gaariga oo khatar ku noqonaaya qofka taabta gaariga.

Sharciga Ohio ayaa sidoo kale qeexaaya qalabka looga baahan yahay gaariyaasha iyo xaaladaha ay qasab tahay in qalabku buuxsho.

Gaariga matoorka ku shaqeeya ee heerka dhexe ah waa inuu lahaadaa qalabkaan:

- **Qalabka isteerinka** kaasoo si caadi ah u shaqaynaaya, oo aan isteerinku uusan aad u jilicsanayn.
- **Taayiro** leh ugu yaraan 1/16 injns qotodiisu tahay aana lahayn waxyeelo dhanka bamka, giraagirta, ama cilad muuqata.
- Ugu yaraan **labo suumanka kursiga ah** oo ku xiran kursiga hore
- Bareegyada:
  - **Bareegga gaariga** kaasoo ku filan inuu tartiibiyo, joojiyo, uuna xakameeyo gaariga
  - **bareegga baakinka** oo ku filan inuu ku qabto gaariga cabir gaar ah
- Nalalka:
  - Labo **nalalka hore ah**, oo hal nal ku xiran yahay gees kasta, oo si fiican u shaqaynaaya
  - Labo **nalalka cas ah** oo ku yaala gadaasha gaariga, loogana jeedo marka loo jiro 300 fiid
  - Hal **nal haad** kaasoo nal cas bixinaaya, lagana arki karo meel u jirta 500 fiid
  - Labo **nalalka cas ee joogsiga ah** (nalalka bareegga) oo looga jeedo meel u jirta 500 oo fiid marka bareegga la qabto
  - **Nalka cad** oo ka muuqanaaya agta meesha taarikadu ku xiran tahay, oo looga jeedo 50 fiid
- **Digniinaha leexashada** oo shaqaynaaya, loogana jeedo meel u jirta 300 oo fiid:
  - Labo ku xiran wajiga hore ee gaariga
  - Labo ku xiran qaybta danbe ee gaariga
- **Gannada tirtira muraayada** oo si fiican u shaqaynaaya, awooda inay wasaqda ka tiraan gaariga
- **Muraayada haadka danbe** oo si waadax ah looga arki karo gadaasha gaariga
- **Hoonka** oo si fiican u shaqaynaaya, oo laga maqli karo meel u jirta 200 oo fiid, loona aqoonsan karo inuu yahay hoon gaari
- **Nidaamka qashin saarka** oo si fiican u shaqaynaaya shaqo joogto ahna haya
- **Nalka daaqada** oo leh heerar la aqbali karo:
  - Muraayada daaqada: 70% nalku ku dusaayo (heerka caadiga ah inta badan gaariyaasha cusub)
  - Daaqadaha geeska ee kursiga hore: 50% nalku ka dusaayo, oo lagu daray ama laga jaraayo 3%

**QAYBTA 2:**

- **KORMEERIDA GAARIGAAGA**
  - TAAYIRADA
  - NALALKA
- **BOOSKA DARAWALKA: WAX KA BADELKA KURSIGA IYO MURAAAYADA**
- **BARKIMAHA BADQABKA**
  - BUUFINNADA AARIYADA
  - SUUMANKA AMAANKA

**Gaarigaagu ma leeyahay dalabaadka soo celinta ee la xariira amaanka? Ku raadi Lambarka Aqoonsiga gaariga (VIN) ee gaarigaaga si aad u hubiso in soo celintiisa la amaray adoo galaaya Webseedka Maamulka Badqabka Wadada ee Qaranka (NHTSA):**

<http://www.nhtsa.gov/recalls>.

## QAYBTA 2: Kahor Intaadan Gaari Wadin

### Badqabka taayirka

Burburka gaariga ee la xariira dayactirka taayirka ayaa laga hortagi karaa, talaabooyin fudud ayaana badbaadin kara nolosha. Ku wadista gaari taayir aan aariyo ka buuxin ama aariyo xad dhaaf ah lagu shubay ama taayiro raftoodu yaraatay ayaa keeni kara dhibaatooyin dhanka badqabka ah oo ka dhaca wadada.

#### Buufinta Taayirka:

- Ku haay taayirada heerka cadaadiska taayirka ee ay shirkada soo saartay u xadaysay. Cadaadiska taayirka ee ay ku talinayso shirkada gaariga samaysay, oo lagu cabiraayo PSI, ayaa ku qoran albaabka.
- Hubi cadaadiska taayirka marka taayiradu ay leeyihiin heerkul lamid ah kan hawada ku meersan.
- Ka qaad daboolka duleelka aariyada kadibna adeegso cabirka cadaadiska si aad u hubiso cadaadiska taayirka.
- (Haddii tiradu aad u hoosayso, aariyee taayiradaada si aad u gaarsiiso heerka saxda ah. Haddii aariyadu xad dhaaf tahay, ka bixi aariyada duleelka aariyada ee taayirka.

**Dhumucda Rafta Taayirka** — Taayir wanaagsan ayaa leh ugu yaraan 1/16 rafta taayirka ah markuu wadada saaran yahay mana lahan bamam ama goo'go, ama waxyeelo murxisay rafta. Qaabka ugu badan ee lagu hubiyo dhumucda rafta taayirka waa shilinka Maraykanka. Geli shilinka uu ku yaalo madaxa Madaxwayne Abraham Lincoln jeexa ugu qotoda dheer ramalka taayirka. Haddii aad aragto dhammaan Madaxa Madaxwaynaha, taayiradaadu aad bay u murxeen—haku wadin gaariga, oo xaqiiji inaad iska badesho.

**Taayirada Kurtinta leh** — Taayirrada kurtinta lehi waa sharci gudaha Ohio, laga bilaabo Noofambar 1 illaa Abriil 15.

### Baro marka aad Isticmaalayso Nalalkaaga

**Nalalka Madaxa** — Sharciga Ohio ayaa qasab ka dhigaaya in nalalka hore ay shidnaadaan qorax dhac ilaa qorax soo baxa, mar kasta oo aragu daciif yahay (roob da'aayo, baraf dhacaayo, ceeryaamo jirto, iwm,), iyo xili kasta oo gacannada muraayadaha sifeeya la isticmaalaayo sabab la xariirta wasaqda fuushay muraayada. Nalalka iftiinka badan ayaa la adeegsan karaa xili kasta oo nalalka hore shidhan yihiin marka laga reebo marka gaari kale kugusoo socdo.

**Digniinaha Leexashada** — Adeegso digniinaha leexashada si aad u muujiso inaad u leexanayso bidix ama midig, si aad u badesho jidaha aad u socoto, ama si aad u badesho laynka aad uga socoto wado layman badan leh. Shid nalka leexashada ugu yaraan 100 fiid kahor intaadan leexan.

**Nalka khatarta** — Adeegso nalka khatarta si aad u kordhiso aragtida gaari joogsaday dhexda ama geeska wadada.

## BOOSKA DARAWALKA: WAX KA BADELKA KURSIGA IYO MURAAAYADA

**Wax ka Badelka Kursiga Darawalka** — Baro qaabka darawalnimada wanaagsan adoo toosinaaya dhabarkaaga oo saaraaya kursiga cagahana dhulka dhigaaya. Kahor intaadan gaariga kaxayn, wax ka badel kursiga si aad u si fiican ugu aragto daaqada aadna si buuxda u maamusho bareegyada iyo isteerinka gaariga, adoo bad ku filan u dhaafaaya fasixida buufinta aariyada. Marka kursigaaga si sax ah loo qaabeeyo:

- Cagtaada ayaa si raaxo leh u fuulaysa bareegga ilaa sheelaraaha adoo ciribtaada dhulka ku haynaaya.
- Dusha isteerinka ayaan ka sarayn karin garbahaaga kana hooseynaaya garkaaga.
- Waxaa jira ugu yaraan 10 inji oo u dhexeeya xabadkaaga iyo isteerinka si aad u siiso bad ku filan buufinta aariyada difaaca.
- Barkinta madaxa ayaa wax laga badelayaa si ay u taabato dhabarka madaxa aysana ka hoosayn heerka dhagahaaga, si looga fogaado in qoortu ku jabto.





## QAYBTA 2: Kahor Intaadan Gaari Wadin

**Nidaaminta Muraayadaha** — Kahor intaadan gaariga wadin, wax ka badel muraayadaha si aad u aragto geesaha iyo gadaasha gaariga.

- Gudaha muraayad haadka danbe: Muraayad haadka danbe waa muraayada ugu muhiimsan ee lagu arko gadaasha gaariga. Wax ka badel si ay u muujiso gadaasha daaqada, gaariyaasha u dhow gaarigana ay ka dhex muuqdaan muraayada.
- Banaanka muraayadaha: Muraayad haadyada banaanka ee sida saxda ah loo nidaamshay si loo yareeyo meelaha aan loo jeedin loona kordhiyo aragga ugu yar ee geesaha iyo gadaasha labada dhan ee gaariga. Ku yaree meelaha kaa qarsoon isbadelladaan:
  - Muraayada dhanka bidix:
    - ◆ Ku nasi madaxaaga daaqada xiran ee geeska darawalka
    - ◆ Toosi muraayada ilaa geeska bidix ee gaariga aan wax badan looga jeedin.
  - Muraayada geeska midig:
    - ◆ Isku leexi dhanka midig si madaxaagu toos uga koreeyo bartamaha buudka shirka.
    - ◆ Hagaaji muraayada dhanka midig si geeska danbe ee gaariga si daciif ah loo arki karo. Ma arki doontid geesaha midig iyo bidix ee gaariga marka aad banaanka muraayada milicsato; hasey yeeshee, hagaajintaan ayaa ku daraysa 12 ilaa 16 digrii oo aaga muuqaalka dheeriga ah gees kasta oo kamid ah dhinacyada gaariga. Waxaa intaas dheer, tani waxay kuu sahlaysaa in muuqaalka qaybta danbe ee gaariga ay u wareegto dhanka muraayada, kadibna marka ay ka baxdo muraayada geeska, gaariga ayaa lagu arki karaa muuqala siman marka darawalku muraayada eego.

## XADIDAADHA BADQABKA

**Buufinnada Hawada** — Buufinnada hawada waa xadidaado kaabis ah waxaana loo sameeyay inay sida ugu wacan ula shaqeeyaan suumanka badqabka kursiga gaariga. Marka gaarigu meel ku dhaco, buufinnada hawada iyo suumanka amaanka ayaa yareeya fursada madaxaaga iyo jirka kore ay ku dhici karaan qaybo kamid ah shirka gaariga. Akhri buugga tasmada ee gaarigaaga si aad uga hesho xog gaar ah oo la xariirta buufinnada hawada ee gaarigaaga.

**Suumanka Amaanka** — Sharciga waajibka ah ee isticmaalka suunka badbaadada ee Ohio wuxuu ka rabaa dirawalada iyo dadka fadhiya xaga hore ee inay xidhaan suunka badbaadada mar kasta oo ay gaadhiga wadaan ama ay fuushan yihiin gaadhi wadooyinka Ohio.

Suumanka amaanka ayaa la xiranayaa xataa haddii gaarigu uu leeyahay buufinnada hawada.

Mar kasta xiro suunkaaga amaanka oo xaqiiji in dhammaan dadka rakaabka ah ay xirtaan suumanka amaanka iyo difaacyada ilmaha. Darawallada iyo dadka saaran kuraasta hore waa inay xidhaan suumanka amaanka. Darawallada ka yar 18 sano, tirada dadka gaariga saaran ayaa ku kooban tirada suumanka badqabka ee horay loogu sameeyay dhammaan dadka gaariga saarana waa inay xidhaan suumanka amaanka.

Waa muhiim in loo xidho suunka amaanka si sax ah:

- Suunka amaanka ayaa waa in lagu xirtaa meelaha lafaha leh (garbaha iyo sinaha).
- Suunka garabka ayaa lagu xiraa garabka iyo xabadka asagoo lahayn, wax duuduub ah. Haka xiran suunka garabka gacanta hoosteeda ama gadaasha dhabarka. Inaad suunka u xirato qaab khaldan ayaa keeni karta dhaawac xun oo uur ku jirta ah oo kugu dhaca marka gaarigu meel ku dhaco.
- Wax ka badel suunka dhabta si uu u qabsado meesha uuna ku dheerarsamo sinahaaga marka aad xirto. Haddii kale, marka gaarigu meel ku dhaco, waxaad ka siiban kartaa suunka, taasoo keenaysa inaad dhaawacanto ama dhimato.

Sidee u eg yahay suunka badbaadada ee kursiga gaariga ee wanaagsan?

Suunka kursiga gaariga oo si **WANAAGSAN** kuu le'eg

### Suunka kursiga ayaa si wanaagsan kuu le'eg marka:

- ✓ Suunka maraaya garbaha uu ka hooseeyo xabadka iyo garabka.
- ✓ Suunka dhabta maraayana uu dul maro cirifka kore ee bawdada, maaha inuu maro caloosha.



Mar kasta si fican ugu xir suunka kursiga carruurta 12 jirka iyo wixii ka yar ee fadhida kuraasta dambe

### QAYBTA 3: Feejignoow

Gaari wadistu waa mid kamid ah shaqooyinka ugu khatarta badan ee aad samayn doonto inta aad nooshahay. Awooda gaari u kaxaynta si amaan ah ayaa ku qoran caafimaadka wanaagsan iyo gaarista go'aanno sax ah.

### ARAGGA

Maadaama aragga wanaagsan muhiim u yahay gaari wadis amaan ah, si joogto ah u baar aragaaga adoo u tagaaya dhakhtarka.

- Haddii aad samayso baaritaanka aragga oo lagu qoro ookiyaale, Ruqsadaada Darawalnimada ayaa lagu muujin doonaa xadidaadaha aragga waana qasab inaad mar kasta xirato ookiyaalahaaga sixitaanka ah marka aad gaari wadayso.
- Iska ilaali adeegsiga ookiyaalaha madoow ama khadda leh habaynkii.

### QAYBTAAN:

- ARAGA
- DAAL
- GAARI U WADISTA SI WAALI AH
- GAARI WADIDA ADOO WAX KALE KU MASHQUULSAN
- KHAMRIGA, DAROOGADA, IYO GAARI WADISTA

*Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan heerarka aragga ee Ohio, ka fiiri Xeerka Maamulka ee Ohio (OAC) Qodobka 4501:1-1-20.*  
<https://codes.ohio.gov/ohio-administrative-code/rule-4501:1-1-20>

### DAALKA

Daalku waa awood daro jireed ama mid maskaxeed oo ka dhalan kara culays dhanka jirka ama maskaxda ah, shaqo soo noqnoqota, xanuun, daawooyin, ama hurdo la'aan. Daalka ayaa saamayn kara aragaaga wuxuuna hoos u dhigayaa waqtiga aad falcelinta ku bixin karto.

### GAARI U WADISTA XAD DHAAFKA AH

Gaari u wadista xad dhaafka ah ayaa timaada marka qof uu si kas ah u sameeyo ficil khatar gelinaaya dadka kale ama hantida. Tusaaleyaasha gaari wadista waalida ah waa ku socoshada xawaare daran, inaad aad ugu dhawaato gaari kale, inaad raacdo layman aan amaan ahayn, nal bixinta khaldan, iyo ku fashilmida ku dhaqanka tilmaamaha tarafiga iyo astaamaha digniinta.

### GAARI WADISTA ADOO WAX KALE KU MASHQUULSAN

Wax kale ku mashquulidu waa inaad dareenkaaga ka leexiso gaariga aad wado, haddii ay tahay inaad gacanta ka qaado isteerinka, inaad indhaha ka qaado wadada, ama hawlaha dhimirka oo maskaxdaada ku mashquulinaaya wax aan ahayn wadista gaariga. Gaari wadista adoo wax kale ku mashquulsan ayaa keenaysa burburka gaariga oo keenaysa in waxyeelo daran ku dhacdo adiga, rakaabka, dadka jidka maraaya, ama dadka kale ee gaariyaasha wada.

Iska ilaali wax kasta oo ku mashquulinaaya - ku hadalka taleefanka, fariin qoraalka, la murmida ama inaad wada sheekaysi dareen ku dhisan la yeelato rakaabka, ama inaad wax cunto adoo gaariga wada. Xaqiiji in carruurta iyo xayawaannada rabaayada ah aad suunka si adag ugu xirto.



Ka  
jeensashada  
wadada



Siidaynta  
isteerinka  
gaariga



Ka  
mashquulida  
gaari wadista

### QAYBTA 3: Feejignoow

Gudaha Ohio, waa sharci daro inaad gaari wado adoo mashquulsan. Tan waxaa ku jira inaad adeegsato aalada elektarooniga gacanta si aad wax ugu qorto, ugu dirto, ama uga akhrido fariin qoraallada.

**Darawallada da'doodu u dhexayso 18 Sano iyo Ka wayn** — Jabinta sharcigaan ayaa ah fal danbiyeed "heer sare ah" (aan ahayn sababta rasmiga ah ee joogsiga socdaalka). Haddii darawal ka shaqeeya Ohio uu galo jebinta sharciga taraafiga asagoo gaari wadista ka mashquulay waxa uu ku mashquulayna ay sabab ku leeyihiin jebinta sharciga, darawalka ayaa bixin doona ganaax dhan \$100, ama ganaax lacageed iyo inuu dhamaysto koorsada mash-quulida adoo gaari wada. Qaar kamid ah sharciyada maxaliga ah ayaa leh xeerarka jebinta sharciga oo u degsan. Sharciyadaas, adeegsiga taleefanka adoo gaari wada ayaa noqon karta danbi wayn oo gaariga loo joojin karo.

**Darawallada kayar da'da 18 sanno** — waa sharci daro in la adeegsado **wax** aalada elektarooniga ah adoo gaari wada, xataa marka aad sugayso nalka wadooyinka ama aad ku jirto saxmada wadooyinka.

- Shardi dhaafyada ayaa ogolaanaaya in la adeegsato aalada si aad ugala socoto jihada aad u jeedo, ama wicitaannada xaaladaha degdega ah.
- Jebinta sharcigaan waa 'danbi wayn' (sabab rasmi ah oo gaariga loo joojin karo):
  - Jebinta koowaad: 60 maalmood oo lagaa hakinaayo Ruqsadaada darawalka iyo ganaax dhan \$150.
  - Jebinta labaad: 1 sano oo Joojinta Ruqsada Darawalka ah iyo \$300 oo ganaax lacageed ah.

### KHAMRIGA, DAROOGADA, IYO GAARI WADISTA

Gudaha Ohio, waa sharci daro inaad wado gaari mator ku shaqeeya adoo cabsan khamri iyo/ama daroogo. Xataa daawooyinka sharciyan laguugu qoray ama daawada qandho jebinta ayaa saamayn kara awooda qofka ee wadista gaariga.

#### **Saamaynada Khamriga iyo Daroogada:**

- **Aragga** — Waxay keeni karaan aragga oo caad fuulo; awooda diirad saarida oo yaraata; iyo awooda go'aan gaarista maskaxda ee badka, xawaaraha, iyo dhaqdhaqaaqa gaariyaasha kale oo hoos u dhacda.
- **Mudada Falcelinta** — Waxay hoos u dhigaysaa Awoodaada fahanka xogta iyo ka jawaabida shaqada gaari wadista.
- **Xukunkaaga maskaxeed** — Waxay hoos u dhigaysaa awoodaada fahanka xaaladaha kugu xeeran iyo gaarista go'aanno degdeg ah

*Si aad fahan fiican uga qaadata cawaaqibiyada xun ee ka dhalan kara gaari wadista adoon fayobayn, ka fiiri burburka gaariyaasha Ohio iyo dhaawacyada gaariyaasha bubura [Bogga OVI](#) ee Ilaalada Wadooyinka Waawayn ee Ohio.*

## QAYBTA 4: Xeerarka Wadada

### XADIYADA XAWAARAHA - ORC 4511.21




Xadiyada xawaaraha ayaa loo arkaa xawaareyaasha macquulka ah ayadoo laga eegaayo naqshada wadada, iyo gaadiidka la filaayo inay wadada maraan, iyo jawiga cimilada qalalan ee aan lahayn ceeryaammada ama ciladaha kale ee saamaynta ku yeelan kara aragga. Xaaladaha aan fiicnayn (tusaale, marka cimiladu xumaato, marka xaalada wadadu xuntahay, ama wadada gaariyaal aad u badan marayaan), xawaaraha macquulka ah ayaa ka yaraan kara xawaaraha meesha ku qoran. Xawaaraha macquulka ah ayaa muhiim u ah in darawal uu raaco si uu u xakameeyo gaaariga uuna bareeg ku qabto asagoo bad macquul ah u jira gaariyaasha ka horeeya.

Ayadood laga eegayn xawaaraha meesha ku qoran, sharciga Ohio ayaa mamnuucaaya in qofku uu gaari ku wado xawaare ka badan mid u sahlaaya darawalka inuu bad ku filan ku istaago.

Si guud, xadiyada xawaaraha ayaa ku xiran nooca wadada (labo layn, wado wayn oo kala qaybsan, iwm.), iyo meesha ay wadadu maro sida ku cad tusaaleyaasha hoose.

### QAYBTA 4:

- XADIYADA XAWAARAHA
- XAQA WADADA
- DIGNIINHAH TARAFIGA
- CALAAMADAH WADADA
- CALAAMADAH LAYMANKA WADADA
- LAYNKA DHANKA BIDIX KELIYA LOO LEEHAN KARO EE WADADA LABADA JIHO AH
- MEESHA DADKU KA GOOYAAN WADADA

XADIGGA XAWAARAHA	GOOBAHA WADADA / NOOCA WADADA
	Wadooyinka dhuuban ee mara xaafadaha magaallada
	Wadooyinka dugsiyada ag mara inta lagu jiro xiliga nasiinada iyo inta carruurta ay soo galayaan ama ka baxayaan dugsiya inta lagu jiro saacadaha caadiga ah ee shaqada
	Wadooyinka dhex mara magaallada
	Wadooyin gobolka ama jidadka waawayn ee gobalka, marka laga reebo wadooyinka galistooda la xukumo ee shirkada dawlada hoose ama ka baxsan meheradaha degmooyinka
	Wadooyinka gobalka ee dhex mara magaallada kana baxsan aagaga ganacsiga
	Wadooyinka furan ee geesahooda dadku lugeeyaan ee ku dhex yaalla xaafadaha magaallada
	Wadooyinka dhaadheer ee deegaannada Miyiga ah

## QAYBTA 4: Xeerarka Wadada

### XAQA WADADA



Xaqa Wadada wuxuu qeexayaa muhiimada isku socodka gaadiidka, taasoo ka dhigan in qof lugaynaaya ama gaari, uu xaq u leeyahay inuu maro meesha kahor dadka kale marka ay jiraan xaalado gaar ah ama goobo gaar ah.

Si loo dhawro badqabka cid kasta, sii xaqa wadada:

- Darawal jooga ama yimid kahor intaadan imaan isgoyska.
- Darawallada hortaada kasoo socda marka aad bidix u leexanayso.
- Darawalka geeskaaga midig ee isgoyska afar irdoodka ah haddii labadiinuba aad timaadeen isgoyska isku mar.
- Darawallada ku socda wadada hayweeyga ah haddii aad soo galayso wadada haayweeyga ah adoo ka yimid wado doceed ama wado xaafadeed.
- Darawallada horay u galay wadada wayn ee gobalka haddii aad joogto ilinka ama rakada sheelara.
- Dadka lugaynaaya, baaskiileeyda, iyo darawallada kale ee wali ku jira isgoyska (arag Qaybta 9 ee Wadaagista Wadada).
- Gaariyaasha Badqabka Dadwaynaha (gurmada Degdega ah, booliiska, dab damiska).

### DIGNIINHA TARAAFIGA – ORC 4511.13

Digniinha taraafiga waa nalal kuu sheegaaya marka aad istaagayso iyo marka aad baxayso. Nalalka taraafiga ayaa caadiyan ku yaala isgoysyada waana kuwo iskugu jira casaan, jaalle, iyo cagaar kor ilaa hoos. Goobaha qaar ayaa lahaan kara nal cagaaran, jaalle, iyo casaan; ama nalalka taraafiga ayaa is feer ooli kara halkii ay layn kala koreeye ahaan lahaayeen.

MIDABKA NALKA TARAAFIGA.		DHAQAAQA TARAAFIGA
<b>CASAAN</b>		Nalka taraafiga ee cas ayaa ka dhigan inaad istaagto kahor intaadan gelin isgoyska. Waa inaad ku sugtaa laynka joogsiga, meesha dadku jidka ka gooyaan, ama isgoyska ilaa nalka taraafigu isku badelaayo cagaar.
<b>JAALLAHA</b>		Nalka taraafiga jaallaha ah ayaa muujinaaya in midabku isku badeli doono casaan; u adeegso digniin ahaan. U diyaar garoow inaad istaagto.
<b>CAGAAR</b>		Nalk taraafiga ee cagaaran ayaa ka dhigan inaad ku safri karto si taxadar leh adoo maraaya isgoyska haddii aysan jirin wax kugu hor gudban. Nalka cagaaran oo leh falaar ayaa sheegaaya inaad u leexan karto meesha falaartu u jeedo adoon joogsan.
<b>NALKA FALAASHKA AH JAALLAHA</b>		Tartiib u soco oo si taxadar leh kusii soco. U diyaar garoow inaad joogsato haddii gaariyaal kale kaagsii horeeyaan isgoyska.
<b>NALKA FALAASHKA CASAANKA AH</b>		Ku joogso gadaasha laynka joogsiga, meesha dadku wadada ka gooyaan, ama isgoyska kahor intaadan gelin oo aadan joogsi buuxa gelin. Xaqiiji inaysan gaariyaal kale aysan goynayn wadada kaa horaysa kahor intaadan gelin isgoyska.
<b>NALALKA TARAAFIGA EE JOGSIGA</b>		Nalalka Joogsiga ee taraafiga ayaa loo qaataa isla sida calaamada joogsiga. Sii xaqa wadada oo feejignooow marka aad galayso isgoyska.

## QAYBTA 4: Xeerarka Wadada

### CALAAMADAHA WADADA

Calaamadaha wadada waxay sheegayaan xeerarka wadada, khataraha, goobta wadada, jihooyinka wadada, iyo goobta adeegyada wadada. Qaabka, midabka, astaanta, iyo tilmaanta calaamadahaan ayaa tusaale ka bixinaaya nooca xogta ay bixinayaan.

**Calaamadahan Maamulka** waxay maamulayaan dhaqdhaqaaqa taraafigga. Calaamadahaan ayaa ogeysiinaya dadka wadada maraaya sharciyada ama xeerarka wadada.



DHAMAAN GAADIIDKA  
MARAAYA JIDKAAN WAA  
INUU ISTAAGA KA HOR  
INTA AANU SII SOCON



ILAALI XAWAARAHA LA  
CAYIMAYINTA LAGU JIRO  
SAACAHADA XADIGA  
AAGA DUGSIGA



WAXAA LOO  
ADEEGSADAA  
ISGOYSYADA, &  
LUUQYADA LOOGA BAXO  
WADADA WAYN



WUXUUU MUUJINAYAA  
WADO HAL JIHO AH



JOOGSO KALIYA HADDII;  
TARAFIGA KALE AY  
SAAMEYN KU DHACAYSO

**Calaamadaha Mamnuucida ah** waxay ku marayaan cidda u jeeda in aan wax talaabo ah la qaadi karin. Goobinta cas ee islaashta ku leh dhexda oo uu ku qoran yahay erayga "NO (Maya)." Mar kasta oo calaamadaan ka muuqato boor, ficilka la tilmaamay waa mamnuuc.



HA U LEEEXAN BIDIX



HA ULABAN GADAAL



LAMA OGOLA BAASKIILLO



**Calaamadaha Digniinta** waxay u sheegayaan darawalka khatar uga imaan karta jidka ka horeeya. Calaamadaha ayaa caadiyan jaalle ah ayagoo lagu qoro xarfo madoow ama astaamo waxayna leeyihiin qaabka dhaymanka.



AFAR IRDOODYADA  
HORAY



LEEXASHOYINKA WADADA  
HORAY



DAGAANDEGA TAAGA  
HEERKA HORAY



ISGOYSKA KAA HOREEYA;  
BIDIX U LEEEXO AMA MIDIG U GAL



SAFARADA WADADA  
JIHOYINKA KAA SOO HORJEEDA



GAARIGA UGU DHOW  
BUUNDADA AYAA LEH WADADA SAXDA



BAASIDU  
WAA MAMNUUC



BAASKIIL JIDKA GOYNAAYA  
HORAY



SIFAYN MUDDO KOOBAN  
HORAY



QAYBAHAHA WADADA




SI TOOS AH UGU LEEEXO DHANKA MIDIG HORTAADA



QOF AYAA WADA KAA HORAYSA GOYNAAYA

## QAYBTA 4: Xeerarka Wadada

**Calaamadaha Aaga Shaqada:** Calaamadahaan ayaa caadiyan leh midabka gudaha oo oranji ah. Waxaa soo dhow goob dhisme, taxadar, yaree xawaaraha, raac tilmaamaha boorarka, oo iska eeg shaqaalaha iyo qalabka jooga wadada/haayweeyga.



Aaga Shaqada, gaadiidka waxaa hagi kara qof wata calaamad ama calan si uu u hago gaadiidka. Waa qasab inaad raacdo tilmaamahaan.

Jid gooyooyinka, sida fuustooyinka iyo haamaha, ayaa ka celiya gaariyaasha inay galaan wadooyinka xiran ama aagaga kale ee khatarta ah in gaari uu galo. Waxay siiyaan shaqaalaha dhismaha "joogsi." Feejignoo, yaree xawaaraha, oo u diyaar garoow inaad joogsato si degdeg ah marka aad kusoo socoto marinka Aaga Shaqada. Sii xaqa wadada, oo bad feejignaan ka fogoow shaqaalaha ama qalabka saaran wadada. Ka fogoow bad ku filan inta u dhexaysa gaarigaaga iyo gaariga kaa horeeya - "haku dabo qaban." Cawaaqibiyada ku safrida xawaare ka badan kan la cayimay ("xawaare dheereeya") oo aad ku maro Aaga Shaqada waxaa ku jiri kara ganaaxyo labo jibaaran iyo xabsi.

**Tilmaamaha Hagista** qaababka ayaa noqon kara kuwo isku weer ah ama afar gees ah, midabyada ayaa noqon kara cagar, baroon, ama buluug. Calaamadahaan ayaa ku siinaaya goobaha muhiimka ah iyo adeegyada laga heli karo geesaha wadada, xog ku aadan wadooyinka isgoyska, kana caawinaaya darawal-lada inay helaan jihooyinka magooyiinka iyo xaafadaha. Tilmaamaha hagista ayaa kaa caawinaaya inaad hesho isbitaallada, xarumaha gaaska ama xarumaha adeegyada, maqaayadaha, iyo huteellada.



**Calaamadaha Lambarka Wadada:** Qaabka iyo midabka calaamadahaan ayaa sheegaaya nooca marinka wadada — wada isku xirta goballada, U.S, gobal, magaallo, ismaamul, ama wado deegaanka. Calaamadaha ku aadan, badadka, iwm, ku jira qariiradaha iyo aaladaha GPS ka ayaa ka caawiya musaafiriinta inay jidka helaan.



County Route Sign



Interstate Route Sign



Off-Interstate Business Route Sign



U.S. Route Sign




State Route Sign

## QAYBTA 4: Xeerarka Wadada

### CALAAMADAHA LAYMANKA WADADA

Calaamadaha marinka geeska wadada waa layman, falaaro, erayo, ama astaamo riinji ahaan loogu muujiyay wadada. Waxay kala qaybiyaan laymanka, waxay kuu sheegayaan marka aad gaariyaasha kale baasi karto, waxay kuu sheegayaan laymanka aad ku leexan karto, waxay muujiyaan meesha dadku wadada ka gooyaan, waxayna ku tusayaan meesha ay qasab tahay inaad ku istaagto marka nalalka taraafigu ku amraan.





## QAYBTA 4: Xeerarka Wadada

### LAYNKA DHANKA BIDIX KELIYA LOO LEEEXAN KARO EE WADADA LABADA JIHO AH

Laynka labada wado ee leexashada dhanka bidix ayaa lagu asteeyaa layn ishaysta oo jaalle ah dhinac kasta laynka. Sidoo kale waxaa lagu asteeyaa falaaraha wadada labada gees ee cad ee u leexashada dhanka bidix.


Laynka dhexe ee la asteeyay aya keliya loogu leexan karaa dhanka bidix. Baabuurta labada dhinac ka socotaa waxaa laga yaabaa inay laynka dhexda si dhakhso ah u isticmaalan ka hor inta aanay bidix u leexan. Kani maaha layn loo adeegsado safarka ama baasida.



### MEESHA DADKU KA GOOYAAN WADADA

Meesha dadku ka gooyaan wadada waxay qeexaysaa aaga dadka jidka goynaaya ay ka goyn karaan marinka wadada. Waa inaad **siisaa** xaqa goynta wadada dadka lugaynaaya ee galaaya meesha dadku wadada ka gooyaan. Haddii uu jiro laynka joogsiga kahor intaadan gaarin meesha dadku wada ka goynayaan, waa qasab inaad laynka joogsiga adeecdaa. Maaha in dhammaan meelaha dadku wadada ka gooyaan ay u calaamadaysan yihiin isku qaab.

#### LAYNKA JOOGSIGA



## QAYBTA 5: Barashada Gaari Wadista

### KICINTA GAARIGA

Akhri buugga tusmada mulkiilaha gaariga si aad u hesho tilmaamo ku aadan kicinta gaariga. Si aad gaariga u kiciso, saar cagta midig bareegga oo saar doorta dhaqaaqa gaariga inuu baarkin galo. Furaha ku rog gaariga oo kici, ama riix batoonka Start (Kici).

### KAXAYNTA GAARIGA

U dhaqaaji batoonka xakaynta dhanka "d" (Dhaqaaji gaariga). Horay eeg si aad u hubiso amaanka wadada oo iska eeg gaariyaasha geesaha iyo gadaashaada. Digniin bixi haddii ay amaan tahayna, ka qaad cagtaada bareegga oo sheelaree gaariga kadibna si tartiib ah u riix. Si tartiib ah oo dabacsan u kordhi sheelaraaha adoo qaybta hore ee cagtaada saaraaya bareega ciribtana dhigaaya dhulka.

### JOOJINTA GAARIGA

Ka eeg muraayadahaaga waxyaabaha ka danbeeya gaarigaaga. Ka qaad cagtaada sheelaraaha kadibna saar bareegga. Saar cadaadis tartiib ah ilaa gaarigaagu si buuxda u joogsado.

Badka ay qaadnayso in gaariga si buuxda loo joojiyo ayaa ku xiran qaybo badan:

- Mudada uu falcelin ku sameeyo darawalku
- Xawaaraha gaarigu ku socdo
- Xaalada bareegyada gaariga
- Xaalada dhulka la maraayo (qoyaan, qalalan, baraf leh, cusbo leh, jaay ah, iwm.)

Sii 3-4 bad gaariga kaahoreeya.

Dirawal waa inuu joogsadaa:

- Gadaasha laynka joogsiga ama meesha dadku ka gooyaan wadada ee joogsi kasta ama calaamada taraafiga ee cas kahor intaadan gelin isgoyska.
- Halka ka dambaysa xariiqa joogsiga ama socod kaga gudubka ee ishaaro taraafig kasta oo casaan ku leexashada ama bidixda ama midigta la oggol yahay. Dirawalka waxaa laga yaabaa inuu sii wato casaan ku leexasho sharci ah kadib marka uu istaago ee dhinaca midigta uu u baneeyo dhammaan baabuurta dhaafaysa iyo dhammaan dadka ka gudbaya wadada.
- Marka uu soo gaadho baabuur badbaado dadwayne (sida gaadhi booliis, dab-damis ama ambilaans) shidanay laydhka oo bixinaya dhawaaq digniin ah, haddii aan u socon jihada kaa soo horjeeda ee wado kala qaybsan. Ku soco inta ugu fog ee suurtoogalka ah ee dhinaca midigta ee wadada oo ay halkaas baaqi ku ahaadaan ilaa gaadhiga gargaarka degdega ahi dhaafayo.
- Laydh cas oo ishaaro oo baxaya, kaas oo u oggolaanay gaadiidku in aanay joogsan.
- Wado ag socodka, ama haddii aanu jirin ag socod, meesha wadada laga galayo, marka aad ka soo baxayso surin, wadada gaarka ah ee ganacsiga ama meel la degan yahay. Darawaladu waa inay dhinaca midigta siiyaan dadka wadada dhinaceeda socda.
- Ka hor inta aanad gelin isgoys haddii aanay jirin meel ku haboon oo wadada dhinaceeda kale ahi oo gaadhi la dhigo. Sharcigu wuu qabanayaa haddii ishaaradu sii dayso iyo haddii kaleba.



### QAYBTA 5:

- KICINTA GAARIGA
- KA XAYNTA IYO JOOJINTA GAARIGA
- ISTEERINKA IYO GADAAL U BIXIDA
- ISGOYSYADA IYO LEEEXASHADA
- AFAR IRDOODYADA AMA WAREEGYADA WADADA
- MARISTA LAYNKA IYO BADELIDA LAYNKA
- GELISTA IYO KA BIXIDA WADADA
- BAASIDA
- ISGOYSKA WADADA TAREENKA
- KA ISTAAGIDA BASKA DUGSIGA
- BAARKINKA

## QAYBTA 5: Barashada Gaari Wadista

### ISTEERINKA

U wareeji isteerinka dhanka aad doonayso in gaarigu u dhaqaaqo, haddii aad horay u socoto ama gadaal u baxayso.

Saar labada gacmoodba banaanka isteerinka adoo ka saaraaya labada dhan, kuna saarayaa cabirka **4** iyo **8 wareeg**, si aad u xakamayso gaariga aadna iskaga ilaaliso buufinnada aariyada haddii ay kici karaan. Qabashadaada isteerinka waa inay noqotaa mid adag laakiin aan xoog ahayn.



### GADAAL U KAXAYNTA GAARIGA

Si aad gadaal ugu bixiso gaarigaaga qaab amaan ah:

- Fiiri gadaasha gaarigaaga kahor intaadan dib u bixin. Ilmaha iyo waxyaabaha yaryar ayaan laga arki karin kursiga darawalka.
- Saar cagtaada bareegga oo gaariga gadaal u bixi.
- Qabso isteerinka adoo ku qabanaaya mareegta 12 gacantaada bidix. Saar gacantaada midig gadaasha kursiga rakaabka oo toos u eeg gadaasha daaqada danbe. Adeegso muraayadahaaga gadaal gelida laakiin niyada ku hay in muraayadahaan aysan ku tusayn aaga aadka ugu dhow gadaasha gaarigaaga.
- Adeegso kaamirooyinka reefiska/gadaal u bixida, haddii ay jiraan, laakiin ayaga keliya ha isku halayn si aad gadaal ugu baxdo, maadaama aysan ku tusi doonin wax kasta.
- Tartiib u sheelaree gaariga, adoo yaraynaaya xawaaraha. Gaarigaaga ayay aad ugu adag tahay inuu xawaareeyo marka uu gadaal u baxayo, U xawaaree dhanka danbe ee gaarigu aadaayo. Haddii aad gadala u baxayso adoo gaariga wareejinya, si degdeg ah u hubi horta iyo geesaha gaariga. Gadaal eeg ilaa aad ka gaarto joogsi buuxa.

### ISGOYSYADA IYO LEEEXASHADA

Dhammaan isqoysyada, yaree xaraawahaaga oo raadi:

- Aaladaha xakamaynta gaadiidka;
- Gaariyaasha kugusoo socda iyo kuwa jidka goynaaya, ayna ku jiraan mootooyinka iyo baaskiillada - fiiri bidix, midig, kadibna bidix markale;
- Dadka lugaynaaya;
- Xaaladaha wadada; iyo
- Meelaha araggu liito.

### Leexashooyinka


Marka aad leexanayso:

- Muuji meesha aad u leexanayso.
- Ka raadi dhammaan geesaha si aad u aragto gaariyaasha socda, dadka lugaynaaya, gaariyaasha kale iyo wixii lamid ah.
- Gal oo ku sugnoow aaga saxda ah ee laynka ugu dhow jihada aad rabto inaad aado.
- Ka raac laynka geeska ugu shisheeya ee suuragalka ah ee ku xiga meesha aad u leexanayso.
- Kordhi xawaaraha si tartiib ah ilaa heerka ku haboon, xaqiiji inaad joojiso digniinta leexashada, oo aad eegto gaariyaasha kaa danbeeya.

## QAYBTA 5: Barashada Gaari Wadista

### Signalka Leexashada

Bidhbidhe leexasho waa in la ridaa ugu yaran 100 fuudh ka hor leexashada. Tan waxaa lagu guulaysan karaa iyadoo la isticmaalayo bidh-bidhaha gaadhiga ama bidh bidhe gacanta ah.



### U leexashada dhinaca Midigta

- Iska ilaali inaad isku balariso dhanka bidix kahor intaadan leexan.
- Markasta dhanka midig uga leexo geeska ugu midigeeya laynkaaga adoo ka leexanaaya dhinaca ugu midigeeya wadada.

### U leexashada Dhanka Bidix

- Marka aad bidix u leexanayso, boos sii gaariyaasha soo socda.
- Markasta bidix u leexo adoo maraaya laynka ugu bidixeeya kadibna galaaya laynka ugu geeseeya bidixda, dhanka midig ee laynka dhexda ka qaybiya wadada aad galayso. Arintaan ayaa qusaysa wadooyinka waawayn ee afarta laynka sidoo kale.


### Leexashada Laymanka Badan

- Aqoonso oo gal laynka aad ka leexan doonto.
- Ku soco laynka ilaa aad la leexato.

### Leexashada Ayadoo Nalka Cas ka daaran yahay Wadada

**Ku leexo dhanka Midig adoo maraaya Nalka Cas** — Waxaad dhanka midig u leexan kartaa adoo maraaya digniinta nalka cas, **ilaa in calaamadu si qaas ah u mamnuucdo maahee**. Marka aad samaynayso leexadka dhanka midig ee hoosta nalka cas, waa inaad marka hore istaagtaa oo aad u oggolaataa baabuurta ku dhaafaysa iyo dadka inay isgoyska baneeyaan ka hor inta aanad hore u socon.

**Dhanka Bidix u leexo adoo Nalka Cas hoos maraaya** — Bidix ayaad u leexan kartaa adoo nalka cas hoos maraaya, **keliya** marka aad ka timaado dhanka ugu geeseeya ee bidix ee wadada kale ee halka jiho ah, ilaa in isgoysku uu leeyahay maahee boor sheegaaya inaan lagu leexan karin ayadoo nalka cas shidan yahay.



## QAYBTA 5: Barashada Gaari Wadista

### tilmaamaha

- Digniinta gaariga marka nalku noqodo cagaar, joogto kahor intaadan gelin isgoyska. Ha isku halayn dadka kale ee wadada maraaya si aad u raacdo tilmaamaha taraafiga ama calaamadaha, waxaa laga yaabaa inaysan ku siin xaqa wadada.
- Marka aad waajahdo xaalad aad marayso aaga nalka cagaaran, laakiin gaariyaashu buuxshaan isgoyska, joogso kahor intaadan gelin isgoyska oo sug in taraafigu ka banaanaado isgoyska si aad horay ugu socoto. Ha gelin isgoyska kadibna joogsan. Ha xanibin gaadiidka maraaya isgoyska.
- Marka aad ku leexanayso wadada, geli waqti aad ku xaqiijiso in wadada aad mari lahayd banaan tahay aysana jirin gaadiid goynaaya hortaada. Waxaad u baahan tahay bad banaan oo wayn si aad gaarigaaga u mariso wadada. Waxaad u baahan tahay bad kugu filan si aad ugu leexato laynka saxda ah iyo inaad kordhiso xawaaraha.
- Haddii aad kusoo socoto gaari shitay nalka leexashada, haku hor goyn ama hortiisa haka leexan adoo xaqiijin in bad fiican idiin dhexeeyo. Ha iska malaysan in gaarigu leexanaayo. Darawalka ayaa laga yaabaa inuu leexan doono markuu ku baaso ama uuba ilaaway inuu nalkiisa leexashada damiyo.
- Marka aad joogsato boorka joogsiga oo aadan arki karin gaariyaal jidka goynaaya, horay u milicso si aad u eegto in gaariyaal soo galayaan isgoyska.

## AFAR IRDOODYADA AMA WAREEGYADA WADADA

Afar irdoodka ama wareegyada wadada waa isgoys goobin ah oo leh qaab ilaalinaaya badqabka iyo isku socodka gaadiidka. Gaariyaasha ayaa ku safraaya qaab iskasoo horjeed ah ayagoo ku wareegaaya geesaha goobin kor u qaadan ayadoo gaariyaasha galaaya ay jid siinayaan kuwa goobinta maraaya. Marka aad marayso afar irdoodka ama goobinada wadada:

- Marka aad soo galayso afar irdoodka, hubi calaamadaha la xariira jihada aad u socoto. Ma badeli kartid laymanka marka aad gasho afar irdoodka.
- Tartiib u soco si aad u gasho afar irdoodka ama mareegta wadada.
- Ka gal afar irdoodka ama mareegta wadada meesha xal goobin ah.
- Sii boos gaariyaasha horay u galay afar irdoodka ama mareegta wadada.
- Eeg bidixda wadada kadibna gal marka laynku kuu banaanaado.
- Marka aad gasho afar irdoodka, sii soco. Ha istaagin ama ka badeli laymanka.
- Ku soco marinka ku haboon, oo shid nalka leexashada, kadibna bax.
  - Adeegso marinka 1aad ee dhanka midig.
  - Adeegso marinka 2aad si aad toos ugu baxdo.
  - Adeegso marinka 3aad si aad bidix ugu leexato.
  - Adeegso marinka 4aad si aad jihadii aad ka timid laynkeeda kale u raacdo.



## MARISTA LAYNKA WADADA

Mar dhinaca midigta ee wadada marka laga reebo:

- Marka aad dhaafayso ee aad waydaaranayso baabuurta kale oo kaa horeeya.
- Marka aad marayso wado u qaybsan saddex layn ama wax ka badan.
- Marka aad marayso wado loogu talo galay oo loo sameeyay calaamadaha hal-wado oo kaliya.
- Marka booliska ama aaladda gaadiidka hagtaa kugu amarto.
- Marka xanibaadi ay daruuri ka dhigto inaad marto bartanka bidix. Sii xaqa wadada gaariyaasha kusoo socda.

Marka aad ku socoto wado leh afar layn ama ka badan, ku soco laynka midig. U adeegso laynka bidix ee bartamaha si aad u baasto ama aad bidix ugu leexato.

## QAYBTA 5: Barashada Gaari Wadista

### BADELIDA LAYMANKA WADADA


Marka aad badelayso laymanka, marka hore xaqiiji in isbadelka la samayn karo si amaan ah sida hoos lagu qeexay:

- Hubi muraayadaada kadibna "meelaha qarsoon" ama aagaga ku xeeran gaariga ee aan la arki karin inta aad adeegsanayso muraayad haadka gadaale, adoo gadaal eegaaya oo fiirinaaya meesha aad rabto inaad u baxdo.
- Aqoonso badka u dhexeeya gaariyaasha, digniin bixi, oo markale eeg jihada aad laynka u badelayso.
- Waafaji sheelaraahaaga iyo xawaaraha laynka aad galayso.
- Dami nalkaaga leexashada.

### GELISTA WADO WAYN OO LAYMANKA BADAN

Kadib marka aad gasho wadada xorta ah, iska eeg horta gaariga fiiri garabkaaga korkiisa ee jihada aad galayso oo u adeegso muraayadaha banaanka si aad u aqoonsato farqiga gaariga. Digniin bixi oo adeegso laynka sheelaraaha si aad u gaarto xawaaraha gaariyaasha kale si aad u raacdo laynkooda.


Xaqiiji inaad damiso nalkaaga leexashada.



### KA BIXISTA WADADA WAYN

Waa muhiim inaad ogaato meesha aad uga baxayso wadada. Qorshee inaad u baxdo laynka kuugu dhow meesha aad ka leexanayso xili hore iska ilaali inaad degdeg ku badesho laynka. Joogtee xawaaraha gaarigaaga ilaa inta aad ku jirto wadada wayn. Digniin ku muuji waxaad doonayso, ku dhawaaw laynka aad ka leexan doonto oo yaree xawaaraha aad ku socotay. Ka fiiri xawaaraha meesha lagu dhejiyay ee laynka leexashada.

Haddii aad seegto bixistaada, qaado ta ku xigta. Ha adeegsan marinka dhex bartanka, kaasoo loo adeegsado gaadiidka gurmada iyo badqabka dadwaynaha.



## QAYBTA 5: Barashada Gaari Wadista

### BAASIDA

Sida loo baaso:


- Fiiri gaadiidka meesha maraaya.
- Ha fiiri muraayadaada iyo geesaha garbahaaga gaariaasha ku dabo jooga ama ku baasaaya.
- Digniin ku muuji waxa aad doonayso marka ay amaan tahay inaad baasto.
- Tartiib u gal laynka leexashada.
- Joogtee ama wax ka badel xawaaraha sida haboon.
- Sii wad inaad baasto ilaa labada nal ee madaxa ee gaariga aad baastay ay ka muuqdaan gadaashaada.
- Muuji doonistaada ku laabashada laynka.
- Tartiib u gal laynka, adoo joogtaynaaya ama wax ka badelaaya xawaaraha sida haboon.

Marka lagu baasaayo:

- Ku joog laynka.
- Ku joog xawaarahaaga si aad u siiso gaariga kale fursad uu kugu dhaafo.

Ha iskudayin inaad baasto marka:

- Gaari kale kusoo socdo laynka.
- Ay wajahada kaa horaysa xirtay leexo ama taag.
- Aad marayso isgoys.
- Aad ku dhowdahay isgoyska wado tareen ama buundo.




## QAYBTA 5: Barashada Gaari Wadista

### Wado layman badan, oo labo Jiho loo raaco

Baasida ayaa la ogol yahay marka ay amaan tahay. Wadada laymanka badan, laynka ugu xiga dhanka bidix ayaa loogu talagalay in lagu baaso gaariyaasha gaabiska ah marka baasida la dhamayn karo ayadoon la carqaladayn isku socodka labada jiho ee wadada. Haka baasin dhanka garabka, haddii boos ka banaan yahay ama uusan ka banaanayn midna.



### Laynka Jaallaha ah ee Xariirka ah ee labada layn, Wado Labo Marin leh

Baasida ayaa laga mamnuucay labada jihaba marka uu jiro laynka jaallaha ah ee xariirka ah oo ku yaala dhex bartanka wadada. Goynta laynka dhexe ayaa loo ogol yahay keliya si aad uga leexato dhanka bidix oo u gasho geeska wadada ama aad u baasto gaari nuutaxaaya (tusaale, baaskiil ama gaari muujinaaya calaamada gaari tartiib u socda) marka ay baddaqab leedahay in sidaas la sameeyo.



### Baasida Aaga labada Layn, Wadada Labada Jiho leh.

Baasida ayaa mamnuuc ah marka aad ku socoto laynka jaallaha xariirka ah ee laynkaaga. Waxaad baasi kartaa keliya marka aad ku socoto laynka jaallaha ah ee kala goo-go'an uu ku qoran yahay marinkaaga.



### Laynka Dhanka Bidix keliya loo leexan karo ee bartamaha Wadada labada Jiho ah

Laynka dhanka bidix loo leexanaayo ee wadada labada jiho ah ayaa keliya loo sameeyay gaariyaasha u leexanaaya dhanka bidix ee u socda labada jiho midkood. Calaamadaha gaarka ah iyo falaaraha marinka ayaa la adeegsadaa. Laynkaan ayaa loo adeegsan baasida, gelida wadada, ama safarka.



## ISGOYSKA WADADA TAREENKA



Calaamada digniinta wareegsan, jaallaha ah ee leh calaamada "X" iyo xarfaha "RR", ama calaamada cad, ee qaabka X leh (isku talaab) oo uu ku qoran yahay qoraalka "Railroad Crossing (Tareenka ayaa Gudbaaya)" ayaa muujinaysa aaga tareenku ka gooyo wadada wayn. Isgoysyada qaarkood ayaa lagu asteeyaa nalka ka shaqaysiinta tareenka oo midab casaan falaash ah leh, oo leh ama aan lahayn albaab. Calaamadahaan waxay kaaga digayaan inaad tartiib u socoto aadna u diyaar garoowdo inaad joogsato marka aad aragto ama maqasho tareenka.



Joogso meel ugu yaraan u jirta 15 fiid isgoyska wadada tareenka marka tareenku uu soo socdo. Sug ilaa tareenku ka gudbaayo digniino kastana ay joogsadaan kahor intaadan ka gudbin isgoyska.

Marka isgoyska lagu asteeyo calaamadaha wadada ama calaamadaha goynta jidka, tartiib u soco oo u diyaar garoow inaad joogsato haddii aad aragto ama aad maqasho tareen soo socda. Haku istaagin laymanka isgoyska oo ha isku dayin inaad laymanka ka gudubto mark tareen uu soo socdo. Haddii jig gooyada lagu asteeyo calaamada joogsiga, dhammaan gaariyaashu waa inay istaagaan kahor intaysan gudbin.

***Darawallada dhammaan gaariyaasha matoorka ku shaqeeya ee sida rakaabka lacagta baxshay, basaska dugsiyada, ama gaariyaasha sida walxaha qarxa ama dareereyaasha dabka kicin kara, ayaa laga doonayaa inay joogsadaan meesha tareenku ka gooyo wadada. Darawallada ayaa wax ka dhagaysta albaabka ama daaqada furan, waxay eegaan labada jihaba si ay u eegaan tareen soo socda, iyo calaamadaha muujinaaya in tareen soo socdo, kadibna qaab taxadar leh yay kusii socdaan.***




## QAYBTA 5: Barashada Gaari Wadista

### KA ISTAAGIDA BASKA DUGSIGA – ORC 4511.75

Darawalku waa inuu ka istaagaa baska dugsiga marka baska dugsigu uu dejinayo ama uu qaadaayo ardayda. Marka dirawalka bas iskuul joogsanayo, wuxuu ama waxay shidaa afar laydh oo cambar ah (jaallaha ah) oo digniin ah, laba xaga hore ah iyo laba danbe. Nalalkaan digniinta ayaa sii wadaaya inay falaash baxshaan ilaa basku gebi ahaanba istaago. Gaariyaasha kale ayaan laga doonayn inay istaagaan inta lagu jiro nalalka falaashka canbarka ah, laakiin waa inay u diyaar garoobaan inay joogsadaan isla marka basku si buuxda u istaago.


Marka basku wada istaago, afarta laydh ee cambarka ahi way damaan oo afar laydh oo cas - laba xaga hore ah iyo laba xaga dambe ah - ayaa bilaaba inay in bidhaamaan inta caruurta korayso ma ka dagayso gaadhiga. Waxaa intaas dheer, baska ayaa lagu xiri karaa gacanka joogsiga oo leh nalalka falaashka casaanka ah oo iskood uga shidmaaya daaqada hoosteeda dhanka bidix ee baska. Haddii aysan jirin gacanta joogsiga, wali waxaa lagaa doonayaa inaad joogsato.



- Haddii gaadhigu istaago jid ama wado leh haadad ka yar afar haad, dhammaan baabuurta baska kaga soo beegan labada dhinac waa inay istaagaan ugu yaraan 10 fuudh meel u jirta horta ama gadaasha baska oo ay halkaa joogaan ilaa basku ka dhaqaaqayo ama dirawalka baska uu signal u bixiyo baabuurta kale si ay u dhaqaaqaan.
- Haddii basku istaago wado ama jid leh afar layn ama ka badan, keliya gaariyaasha u socda isla jihada basku u socda waa inay istaagaan aaga baska ayna taagnaadaan ilaa basku bilaabo inuu socdo.

Darawallada baska dugsiga ee aaminsan in darawal gaari uu sifo sharci daro ah ku dhaafay bas taagan, haddii ay suuragal tahay, ayaa u soo sheegi doona lambarka taarikada iyo goobta wakaaladaha ciidanka booliiska, kuwaasoo iskudayi doona inay go'aanshaan aqoonsiga darawalka.

## SCHOOL BUS SAFETY: KNOW WHEN TO STOP



## QAYBTA 5: Barashada Gaari Wadista

### BAARKINKA

Mar kasta ku baakimo aaga loo asteeyay. Gaariyaashu waa in la baarkin gareeyaa isagoo u jeeda jihada baabuurta dhinaca ka maraysa jidka, barbaryaal wax aan ka badnayn 12 inji ee dhinaca midigta. Jidadka dhinaca kaliya ahi, baabuurta waa in lagu baarkin gareeyaa meel la siman oo aan 12 inji ka fogayn cidhifka wadada. Baarkinka xagasha leh waxaa lagu asteeyaa layman.



### Aagaga Aan baarkinka loo Ogolayn / Goobaha dadka Naafada ah

Ka fiiri calaamadaha ama rakooyinka riinjiga leh ee mamnuucaaya ama xadidaaya baarkinka. Xadidaadaha baarkinka qaarkood ayaa lagu muujiyay calaamadaha rakada midabka leh. Haku baarkimin goobaha lagu sawiray gaari curyaanka oo loo asteeyay dadka naafada ah, ilaa in lagu siiyay maahee kaarka naafada ama taarikada naafada.



### Joogsiga, Baarkinka, ama Joogsiga la Madnuucay - ORC 4511.68

Oofna waa in aanu istaagin, gaadhiga dhigin ama gaadhiga dul istaagin wax kamid meelaha soo socda, marka laga tago marka ay daruuri u noqoto in lagu baajiyo gaadiidka kale in la isku dhaco, ama in loo hogaansamo tilmaamta sarkaal bilays ah ama aaladaha lagu maamulo gaadiidka:



- Geeska wadada;
- Wadada meel dawladeed ama meel gaar ah horteeda;
- Gudaha ama aaga u jira 20 fiid kayar isgoyska ama meesha dadku wadada ka gooyaan;
- Meel 10 fuudh ka durugsan biyo-mareenka dabka;
- Meel hal fuudh u jirta gaadhi kale oo baarkin garaysan;
- Meel ku xigta gaadhi la joojiyey ama lagu baarkin gareeyay cidhifka wadada;
- Meel kasta oo calaamada mamnuucida joogsigu ku dhagan tahay.

Baaskiil, baaskiilka korontada ku shaqeeya, mooto, iskuukar (150 cc ama ka yar), ama aalada gaadiidka ah ayaa la dhigan karaa geeska wadada marka la xaqiijiyo inaysan carqalad gelinayn isku socodka caadiga ah ee dadka meesha maraaya.

### Ku baarkimida Taag ama Dhul sare

Marka ay qasab noqoto inaad gaarigaaga ku baarkinto meel taag ah ama dhulka saraysa, u leexi taayirka hore dhanka geeska rakada wadada si aad u xasiliso gaariga, kasoo wareeji qaybta "DRIVE" oo u wareeji "PARK", ku qabo bareegga baarkinka, oo dami gaariga.



**QAYBTA 6: Sharciyada Gobalka iyo Ganaaxyada****CAYMISKA – MASUULIYADA DHAQAALAH**

ORC 4507.212 IYO 4509.101

Gudaha Ohio, waa sharci daro in la wado gaari matoor ku shaqeyaa oo aan lahayn caymis, waana sharci daro in mulkiilaha gaarigu uu ogolaado in qof kale uu wado gaarigiisa matoorka ku shaqeyaa asagoon lahayn caymis. Darawallada ku fashilma inay keenaan caynta caymiska ayaa laga xanibi karaa taarikadooda, la hakin doonaa Ruqsadooda Darawalka, waxaana la saari karaa lacago ganaax ah iyo qarashka soo celinta taarikada. Cadaynta masuuliyada dhaqaalaha (\*caymiska) waa in la keena marka ay xaaladahaan jiraan:

- Mar kasta oo booliisku ay tigidh kusoo dalacaan.
- Dhammaan joogsiyada kormeerka gaariga.
- Dhammaan Xaadirista Maxkamadaha Taraafiga.
- Marka midkood darawalka ama mulkiilaha gaarigu uu qayb ka noqdo isku dhac wado oo keenaysa khasaarada hanti ka badan \$400.

Shuruudaha ugu yar ee masuuliyada caymiska waa:

- \$25,000 oo dhaawaca/geerida hal qof ah, iyo
- \$50,000 oo dhaawaca/geerida labo qof ama ka badan, iyo
- \$25,000 oo waxyeelada hantida ka soo gaarta shilalka;

AMA

- Damaanada gaarka ah ee kahor shilka oo lagu daboolayo masuuliyada heerka kore ah, iyo
- Abuurista damanada \$30,000 ah ee loo dhiibo qasnajiga Gobalka ama codsashada shahaadada caymiska iskaa ah marka aad leedahay wax ka badan 25 gaariyaasha matoorka ku shaqeyaa ah.

Darawallada gala danbiyada waawayn ee wadooyinka, oo gaaraaya ilaa 12 dhibcood ama ka badan labo sano gudahood, ama meel ku dhufata gaariga aan caymiska lahayn ayaa laga codsan doonaa cadaynta ay ka haystaan Laanta oo sheegaysa inay haystaan caymiska khatarta wayn.

**Marka aad gaarigaaga ka diiwaan geliso Ohio iyo/ama aad codsato Ruqsad cusub, dib u cusbooneysiin ah, ama Koobi ah, waxaad saxiixi doontaa bayaanka dhaarta ah oo sheegaaya inaad ku shaqayn doonin gaari matoor ku shaqeyaa adoon haysan caymiska masuuliyada ama nooc kale oo masuuliyad dhaqaale oo shaqaynaysa.**

**KHAMRIGA, DAROOGADA, IYO GAARI WADISTA**

Kaxaynta gaadhi iyadoo la cabsan yahay khamri iyo/ama daroogo waxay ka soo hor jeedaa sharciga Ohio. Xataa daawooyinka laguugu qoray ama daawada qandho jebinta ayaa saamayn kara awooda qofka ee wadista gaariga.

**Saamaynada Khamriga iyo Daroogada**

**Aragga:** Waxay keeni karaan aragga oo caad fuulo; awooda diirad saarida oo yaraata; iyo awooda go'aan gaarista maskaxda ee badka, xawaaraha, iyo dhaqdhaqaaqa gaariyaasha kale oo hoos u dhacda.

**Mudada Falcelinta:** Waxay hoos u dhigaysaa Awoodaada fahan ka xogta iyo ka jawaabi-da shaqada gaari wadista.

**Xukunkaaga maskaxeed:** Waxay hoos u dhigaysaa awoodaada fahanka xaaladaha kugu xeeran iyo gaarista go'aanno degdeg ah



Booqo [Bogga OVI](#) ee Ilaallada Wadooyinka Waawayn ee Gobalka Ohio si aad u hesho Cabirada Ohio.

**QAYBTA 6:**

- CAYMISKA - MASUULIYADA DHAQAALAH
- KHAMRIGA, DAROOGADA, IYO GAARI WADISTA
- GANAAXYADA
- ISKA LAALAADINTA DHINACA GAARIGA
- SHARCIYADA XADIDAADAH/ BADQABKA GAARIGA SIDA ILMAHA

## QAYBTA 6: Sharciyada Gobalka iyo Ganaaxyada

### Khamriga iyo Sharciga

Gudaha Ohio, da'da sharciga ah ee khamro lagu cabi karo waa 21 sano iyo ka wayn waana sharci daro in la kaxeeyo gaari matoor ku shaqeeya ayadoo qofka dhiigiisa ay ku jirto khamri (BAC) dhan:

- .08% ama ka badan da' kasta
- .04% ama ka badan darawallada gaadiidka ganacsiga
- .02% ama ka badan marka qofku ka yar yahay 21 sano

Haddii qof Loo joojiyo sabab la xariirta shaki quseeya isticmaalka daroogada iyo/ama khamriga, ama xakamaynta farsamo ee gaariga asagoo qofku cabsan, sarkaalka ayaa samayn doona baaritaanka fayobida maskaxeed kadibna codsanaaya hubinta kiimikada si loo go'aansho in khamri iyo/ama daroogo ku jirto dhiiga. Cadaynta in alkaahool la cabsanaa markii la waday gaadhigu waxay ku salaysan tahay cadayn jidheed oo uu soo ururiyey sarkaalka xadhiga sameeyay iyo natiijada baadhis lagu sameeyay dhiig, balaasmada, neefsiga iyo kaadida.

**Imtaxanka Hakinta Ruqsada Maamulka (ALS) ee la xariira Xadiga** — Haddii qof uu ogolaado in baaritaan dhanka kiimikada ah lagu sameeyo labo saacadood gudahood marka la xiro baaritaankuna uu muujito BAC dhan .08 ama ka badan sarkaalka xiraaya ayaa la wareegaaya Ruqsada Darawalka una sheegaaya darawalka in laga xiray ruqsada. Bayaan dhaarin ah ayaa loo diraaqaya BMV hakinta ruqsada soconaysa shan sano ayaana la bilaabayaa isla markaba. Qofku wuxuu xaq u leeyahay inuu helo baarikaanka kiimikada oo madax banaan oo uu iska dhiibaayo qarashka qaadista.

**Diidmada Imtaxaanka Hakinta Ruqsada ee Maamulka (ALS)** — Haddii qof uu diido inuu gudbiyo baaritaanka kiimikada labo saacadood gudahood marka la xiray, sarkaalka soo xiray ayaa la wareegi doona Ruqsada Darawalka bayaanka dhaarta u diraaqaya BMV si ay loo cadeeyo in qofku baaritaanka diiday. BMV ayaa laga doonayaa inay hakin kusoo rogto muddo dhanka hal sano ilaa shan sano, kaasoo isla markaba bilaaban doona. Hakinta ayaa ayaa sii socon doonta xataa haddii qofka laga qaado qarashka OVI (wadista gaari asagoo naafo ah).

**Wadista Gaari kadib Marka qofku Cabo Khamri Asagoon gaarin Da'da Sharciga ah (OVUAC) (kayar da'da 21)** — Ganaaxa OVUAC ayaa keeni kara hakinta ruqsada muddo sadex bilood ah ilaa labo sano ah waxayna u baahan tahay in darawalku maro koorsada edbinta darawalnimada, uu baxsho qarashka soo celinta ruqsada, uuna mar kale galo imtaxaanka Ruqsada Darawalka. Darawalka ayaa sidoo kale la dhigi karaa xabsi.

**Ganaaxyada Khamriga iyo Daroogada** — Mudada Hakinta Ruqsada ee Maamulka (ALS) waxaa lagu jaan gooyaa tirada diidmooyinka hore ee imtaxaanka ama OVI/xukunnada daroogada intii lagu jiray 10 sano ee lasoo dhaafay:

- ALS — Diidmada Baaritaanka:
  - Diidmada Koowaad - Hal sano oo ruqsad hakin ah
  - Hal Diidmo oo Hore ama Xukunka OVI/Daroogada - Labo sano oo ruqsad hakin ah
  - Labo Diidmo oo Hore ama Xukunka OVI/Daroogada - Sadex sano oo ruqsad hakin ah
  - Sadex Diidmo oo Hore ama Xukunka OVI/Daroogada - Afar sano oo ruqsad hakin ah
- ALS — Tijaabada Dhaafida Xadka:
  - Tijaabada Koowaad ee Xad dhaafka Xawaaraha - Sadex bilood (90 Maalmood) oo Ruqsad Hakin ah
  - Hal OVI/Xukun Daroogo oo Hore - Hal sano oo Ruqsad Hakin ah
  - Labo OVI/Xukun Daroogo oo Hore - Labo sano oo Ruqsad Hakin ah
  - Sadex OVI/Xukun Daroogo oo Hore - Sadex sano oo Ruqsad Hakin ah

Waxaa intaas dheer, haddii qof lagu xukumo OVI muddo shan jeer ama ka badan 20 sano gudahood sabab la xariirta inuu jebiyay OVI, waa in qofkaas sidoo kale xabsi lagu xukumaa; waxaa la marsiin karaa in laga xiro ama lagala wareego gaarigiisa; iyo in la gasho Diiwaanka Danbiilaha Caadaystay OVI/OMVI ee Ohio.

## QAYBTA 6: Sharciyada Gobalka iyo Ganaaxyada

### Daroogo Naafayn ah iyo Gaari Wadista

Marka laga reebo khamriga, daroogooyin kale oo badan ayaa saamayn kara awoodaada gaari u wadista qaab amaan ah. Xaqiiqdi, maado kasta oo marka ay gasho jirka aadanaha waxyeelo u gaysan karta awooda qofka ee maaraynta gaariga si amaan ah.

**Daawooyinka Qandho Jebinta** ayaa saamayn kara awoodaada gaari wadista. Akhri tilmaamaha digniinta ah ama waydii dhakhtarkaaga/farmashiilaha cilado kasta oo ka dhalan kara kahor intaadan daawada liqin.

**Daawooyinka lagu qoro** sida daawada kahortagta niyad jabka, xanuun baabi'iyaasha, kaabeyaasha hurdada, iyo daawooyinka suuxinta, ayaa saamayn ku leh gaari u wadista si badqab leh. Akhri tilmaamaha digniinta ah ee daawada ama waydii dhakhtarkaaga/farmashiilaha cilado kasta oo ka dhalan kara kahor intaadan daawada liqin.

**Darogada Sharci Darada ah** waxay saameeyaan sugnaanta, garashada, araga, iyo feejignaanta waa inaan marka la cunin marka gaari la wado.

Marna haku qasin khamri iyo daroogooyin kale. Daroogooyinka ayaa kordhin kara saamaynada khamriga ama keeni kara dhibaatooyin u gaar ah.

## GANAAXYADA

**Qiimaynta Xaalada Ruqsada Darawalka** — Darawal kasta oo Ohio oo lagu helo xadgudub taraafiga waxaa lagu qiimayn doonaad dhowr dhibcood oo dambi iyadoo loo eegayo nooca xadgudubka. Inta jeer ee ganaaxyada lagu saaray jebinta sharciyada wadada ayay qiimayn doontaa maxkamadu.

- Haddii darawalku yeesho lix dhibcood muddo labo sano ah gudaheed, BMV ayaa u diraysa waraaqda digniinta lixda dhibcood darawalka.
- Haddii darawalku keeno 12 dhibcood ama ka badan labo sano gudahood, BMV ayaa kusoo qoraysa xanibaada 12 dhibcood ah oo halkinta Ruqsada Darawalka ah. Si loosoo cesho ruqsada darawalnimada, shuruudo gaar ah waa in la buuxshaa, laakiin kuma koobna, buuxinta koorsada soo kabashada darawalka ah, buuxinta damaanada SR-22 ee BMV, iyo bixinta qarashka soo celinta ruqsada.
  - SR-22 waa shahaadada masuuliyada dhaqaalaha. SR-22 maaha "nooca" dhabta ah ee caymiska, laakiin waa foom laga dhex isticmaalo gobalka. Foomkaan ayaa noqonaaya cadaynta in caymiskaaga gaarigu uu buuxinaayo daboolista caymiska ee ugu yar ee sharciga gobalku dalbanaayo.
- Dhibcaha Sharci Jebinta:
  - 2 Dhibcood - jebinta xeerarka socdaalka, danbiyada xawaaraha qaarkood, jebinta xadidaadaha
  - 4 dhibcood - kas u jebinta ama iska indho tirista badqabka qofka ama hantida
  - 6 Dhibcood - Ku fashilmida joogsiga iyo shaacinta aqoonsiga kadib marka aad meel gaariga ku dhufato iyo arimo kale oo khatar ah iyo ficilo daran

**Joojinta Ruqsada Tijaabada ah (Ka yar da'da 18)** — BMV ayaa si otomaatig ah u hakinaysa ruqsada darawalka ka yar 18 sano marka xaaladahaan dhacaan:

- Lagu xukumo, ama uu qirto inuu galay labo jebinta sharciga socdaalka ah, taasoo keenaysa in ruqsada laga xanobo muddo sadex bilood ah;
- In lagu xukumo, ama uu qirto inuu sadex jeer jebiyay xeerarka socdaalka, kaasoo keenaaya in hal sano laga xanibo ruqsada; iyo
- In lagu xukumo, ama uu qirto inuu waday *Gaariga Ruqsada Ku meel gaarka ah asagoo Cabsan*, taasoo keenaysa in lix bilood ruqsada lagala noqdo.

Shuruudaha soo celinta ruqsada waa in la buuxshaa marka la dhamaysto mudada hakinta, ayna ku jirto in la qaato TIPIC, buuxinta barnaamijka hormarinta darawalka carruurta ah, iyo ku baasida imtaxaanka gaari wadista.

## QAYBTA 6: Sharciyada Gobalka iyo Ganaaxyada

**Gaari Kaxaynta Aadoo Ruqsada Lagaa Hakiyay** — Kaxaynta baabuur marka ruqsadaada uu tuhun ku jiro waa dambi heer koowaad ah, haddii lagugu helana, waxaa lagaa qaadayaa takhsiiir ilaa \$1,000 ah. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in lagugu xukumo hal sano oo dheeraad ah oo ruqsada baabuurka lagaa laalo. Mulkiileyaasha gaariyaasha sida kaska ah ugu ogolaada qof ruqsada laga xanibay inuu wado gaarigooda ayaa waajihi kara isla ganaaxa darawalka ku jira hakinta ruqsada.

### ISKA LAADLAADINTA DHINACA GAADHIGA - ORC 4511.51

Qofna waa in aanu iska laadlaadin ama fuulin dhinaca gaadhi socda. Waa inaan dirawal gaadhi wayn, ama is-jiid aanu si badheedh ah ugu oggolaan qof ka yar 16 jir inuu fuulo qaybta kaargo ee dusha banana ama aan shiraacnayn ee gaadhiga haddii uu u socdo xawaare ka dheeraynaya 25 mph, haddii arimahan soo socda midkood aanu jirin:

- Qaybta alaabada ee baabuurka uu ku qalabaysan yahay kursi amaan ah iyo suunka badqabka gaadhiga oo waafaqsan halbeega federaalka ee qalabka ilaalinta amaanka rakaabka.
- Ay jirto xaalad degdeg ah taas oo halis ku ah nolosha dirawalka ama qofka saran buudhiga gaadiga, ama is-jiidka, gaadhi wayn.
- Rakaabku yihiin shaqaale wadada ka qabanaya hawl qaas ah ama hagaajinta wadada ama dhisme iyagoo awood ka haysta masuuliyiinta hay'addooda.

### SHARCIYADA XADIDAADAHA/BADQABKA GAARIGA SIDA ILMAHA - ORC 4511.81

**Sharciga Ohio ayaa qasab ka dhigaaya adeegsiga kursiga badqabka ilmaha oo buuxinaaya heerarka badqabka gaariga matoorka leh ee federaalka.** Xaqiiji in si sax ah loogu xiray gaarigaaga loona adeegsaday si waafaqsan tilmaamaha shirkada gaariga samaysay. Hubi si aad u xaqiijiso in **dhamaan carruurta jira 12 sano iyo ka yar ay si fiican ugu xiran yihiin suunka kursiga danbe** iyo in kursiga ilmaha ee badqabka ee gadaal u jeeda **uusan marna hor oolin buufinta aariyada ee rakaabka.**

**Kayar 4 jir miisaankooduna ka yar yahay 40 bawn** — Dhalaanka yo carruurta ee ka yar 4 jir isla markaana miisaankoodu ka yar yahay 40 rodol waa in si fiican loogu xajiyaa kursiga badbaadada carruurta marka laga wado gaadhiga. Kuraasta carruurta waa inay ku qoran tahay buuxinta heerarka laga filayo badbaadsanaanta federaalka oo loogu talagalay inuu daboolo baahiyaha gaarka ah ee gaadhigaaga.

**Da'da 4 sano iyo miisaan dhan 40 bawn laakiin ka yar 8 sano jir** — marka ilmo jira ugu yaraan 4 sano, laakiin ka yar 8 sano, uu saaran yahay gaariga, darawalka gaariga ayaa xaqiijinaaya in ilmaha si fiican loogu xiro kursiga kaabista ah ilaa in ilmuhu dhan yahay maahee 4 fuud 9 inji joog ahaan, ama ka dheer yahay.

**Da'da 8 sano laakiin ka yar 15** — marka ilmo jira ugu yaraan 8 sano, laakiin ka yar 15 sano, uu saaran yahay gaariga, darawalka gaariga ayaa xaqiijinaaya in ilmaha si fiican loogu xiro suunka amaanka.

**Ilmaha jira 12 sano iyo kayar** waa inay fariistaan kursiga danbe ee gaariga si looga difaaco dhaawac kasoo gaaray bacda aariyada marka gaarigu meel ku dhaco.

**Shardi dhaafyada** la xariira xogta kore waxaa kamid ah gaariyaasha badqabka bulshada, tagaasida, iyo gaariyaasha uusan sharcigu ka doonayn in lagu xiro suumanka badqabka marka la soo saaraayo.

Akhri buugga tasmada darawalka ee gaarigaaga iyo tilmaamaha sugida amaanka ilmaha si aad u hesho xog gaar u qusaysa nidaamka sugida amaanka ilmaha ee gaarigaaga.

**Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku aadan badqabka ilmaha gaariga saaran iyo sharciga, wac Lambarka Bilaashka ah ee Waaxda Caafimaadka Ohio, oo ah 1-800-755-GROW. Booqo [Webseedka Waaxda Caafimaadka ee Ohio](#) si aad u hesho xog dheeraad ah.**

**QAYBTA 7: Xaaladaha Gaari Wadista ee Gaarka ah****JOOGSIYADA BOOLIISKA IYO TARAFIGA**

Waxa aad samaynayso haddii uu ku istaajiyo booliisku:

- Shid nalkaaga leexashada marka ay sidaas amaan tahay, u leexo dhanka midig ee wadada, ama goobta kuugu dhow ee amaanka ah.
  - Ka dhaqaaji gaarigaaga batoonka “DRIVE” oo gee “PARK”
  - Matoorka “DAMI” (ama riix batoonka “STOP”)
- Hoos u dhig muraayada daaqada oo gaariga ku sugnoow ilaa in sarkaalku amar kale ku siiyo maahee.
- Isdeji oo suunkaaga amaanku ha kuu xirnaado.
- Gacmaha ku haay isteerinka adoo sarkaalka fiirinaaya.
- Haddii gaariga hub kuu saaran yahay, u sheeg darawalka marka koowaad ee uu kuu yimaado.
- Rac awaamiirta sarkaalka.
- Marka lagaa codsado, soo bixi Ruqsada Darawalka, diiwaan gelinta agariga, iyo xogta caymiska.
- Qaado amarka oo hala murmin sarkaalka. Haddii aad qabto su'aalo, si edabsan u waydii sharaxaad.
- Haddii aad diidan tahay tigidhka taraafiga, waxaad tigidhka ka difaacan kartaa maxkamada.

**QAYBTA 7:**

- JOOGSIYADA BOOLIISKA IYO TARAFIGA
- MARKA AAD SHIDANAYSO NALALKA HORE
- GAARI WADISTA HABAYNKII
- GAARI WADISTA XILI CEERYAAMO JIRTO
- GAARI WADISTA XILIGA QABOBAHA
- AAGAGA SHAQADA

*Xog dheeraad aha ayaa ka helaysaa muuqaalkaan [“Waxa aad Samayayso marka Lagu Joojiyo”](#).*

**MARKA AAD ISTICMAALAYSO NALALKA GAARIGA – OAC 4501-15-01**

Nalalku waa inay shidnaadaan:

- Inta u dhaxaysa qorax dhaca ilaa qorax soo baxa.
- Xili kasta oo roob da'ayo, baraf, ama xaalad cimilo oo kale oo aan haboonayn — iyada oo aan loo eegayn xiliga maalinta.
- Xili kasta oo kale oo xaaladaha laydhka dabiiciga aanay suurtoagal ka dhigayn in la arko waxyaabaha 1,000 fuudh kaa horeeya.
- Xili kasta oo gacannada muraayada tirtira la isticmaalaayo sabab la xariirta bus fuushay.

**GAARI WADISTA HABAYNKII**

Wadista gaari xiliga habaynkii ayaa ka dhib badan kana khatar badan wadista xiliga maalintii. Badka aad aragto horta gaarigaaga ayaa ku xadidan heerka nalka ee nalalkaaga hore ku siiyaan. Si aad u ilaaliso badqabka intaad gaariga wado habaynkii:

- Nalalka hore waa inay shidnaadaan inta u dhaxaysa qorax dhac ilaa qorax soo bax.
- Ku soco xawaare feejignaan leh oo macquul ah.
- Adeegso nalalka hore oo iftiin badan marka uusan jirin gaari hortaaga kasoo socda. Sharciga Ohio ayaa kaa doonaaya inaad yarayso nalkaaga hore marka gaariyaal hortaada kasoo socdaan.
- Si aad iskaga ilaaliso in nalalka hore ee gaariyaasha soo socda ku indho tiraan, eeg dhanka midig ee wadada.
- Eeg marar kaladuwan dhinacyada midig iyo bidix si aad u go'aamiso meesha geeska wadadu kaa xigo iyo khataraha kaaga imaan kara geesaha.
- Ha xiran ookiyaalaha qoraxda ama ookiyaale midab leh marka aad habaynkii wado gaari ama maalmaha roobku da'aayo. Ookiyaalaha mugdiga ah ama midabka leh ayaa hoos u dhigaaya aragaaga.

## QAYBTA 7: Xaaladaha Gaari Wadista ee Gaarka ah

### WADISTA GAARIGA XILI AY CIIRYAAMO KACSAN TAHAY

Barafku waa xaalada ugu halisan ee darawalku ku socon karo. **Tartiib u Soco!**

- Raac gaariyaasha kale, laakiin ku soco xawaare la dhimay adoo filanaaya inaad joogsan karto xili kasta. Bad joogto ah u jirso gaariga kaa horeeya.
- Adeegso nalalka hore ee iftiinka yar (aan lahayn iftiin saa'id ah) oo sii wad inaad aaga ka fiiriso khataro kasta oo jiri kara.
- Ha ku dhaygagin halkii aad ka eegi lahayd.
- Haddii aad shil gasho, ka saar gaarigaaga wadada sida ugu dhakhsaha badan ee badqabka leh. Haddii aan gaarigaagu soconayn, shid nalalkaaga falaashka iyo nalalka kale oo shid nalalka digniinta haddii ay suuragalayso.

### WADISTA GAARIGA XILIGA QABOобаHA

Kaxaynta baabuurka xiliga qaboobaha aad bay uga duwan tahay kaxaynta baabuurka xili kasta oo kale oo sanadka ah. Ayadoon laga eegayn nooca wadada ama cimilada lagu jiro, hoos u dhigsita xawaaraha ayaa muhiim u ah maaraynta gaarigaaga si amaan ah, laakiin si gaar ah ayay muhiim u tahay wadooyinka barafka leh. Ka fogaow bad ka wayn sidii caadiga ahayd inta u dhexaysa adiga iyo gaariyaasha kale, maadaama gaariyaashu ay u bahaan karaan bad joogsi oo dheeraad ah marka wadadu sidib tahay.

**Xasuusnoow:** Buundooyinka, baasitaannada, iyo baraha astaysan ee wadada wayn ayuu barafku buuxshaa marka hore! Inaad tartiib u riixdo bareega ayaa kaa caawinaysa inaad yaraysa xawaaraha adoon lumin heerka aad ku socoto. Haddii gaadhigaagu bilaabo inuu sidbado, lugtaadka ka qaad leewarka ooleexi isteerinka adigoo u jeeda dhinaca silbashada. Waligaa biriiga ha qaban marka aad silbato.



### AAGAGA SHAQADA

Aaga Shaqada waa aag shaqada wadadu ka socoto waxayna qusayn kartaa xirista laymanka, marinnada, iyo qalab soconaaya. Aagaga Shaqada waa goobo khatar wayn u leh shaqaalaha iyo darawallada labadaba. Marka aad kusoo dhowdahay Aag Shaqo, fiiri calaamadaha, goobinnada, fuustooyinka, gaariyaasha waawayn, iyo shaqaalaha.

Calaamadaha aaga Shaqada ayaa leh midab oranji ah iyo xarfo ama astaamo madoow ah. Mar kasta yaree xawaarahaaga Aaga Shaqada, xataa haddii aysan joogin shaqaale. Laymanka dhuuban iyo marinnada rafka ah ayaa abuuri kara xaalad khatar ah.



Waaxda Gaadiidka ee Ohio ayaa xog dheeri ah ka bixinaysa badqabka [Aaga Shaqada](#)



## QAYBTA 8: Tilmaamaha Gaari Wadis Amaan ah

Gaari wadista ayaa u baahan xirfado aad keliya ku heli karto barasho iyo khibrad gaari wadis. Qaybaha soo socda ayaa bixinaaya tilmaamaha qaar oo la xariira gaari wadista aad samayn karto si ay kaaga caawiso inaad noqoto darawal badqab badan oo xirfadloow ah.

### EEGISTA AAGA

Waxaad masuul ka tahay inaad ogaato waxa ka socda aaga gaarigaaga. Abuur qaab baaris oo aad u adeegsan karto mar kasta oo aad gaari wadayso. Baarista ayaa kaa caawinaysa inaad aragto xaaladaha keeni kara dhibaato, wuxuuna ku siinayaa waqti aad ku badesho xawaarahaaga ama meesha aad wadada uga socoto.

### QAYBTA 8:

- EEGISTA AAGA
- MAARAYNTA XAWAARAHA — LA QABSIGA XAALADHA WADADA
- MAARAYNTA MEESHA BANAAN
- XARIIRINTA
- KAHORTAGA DHAAWACA KA DHASHA GAARIYAASHA KULUL

### HORTAADA FIIRI

Inaad eegto wadada aad doonayso inaad ku socoto ayaa kuu sahlaya inaad aragto wadada, dadka kale ee wadada isticmaalaaya, iyo xaaladaha wadada. Waxay sidoo kale ku siinaysaa waqti aad isbadel ku samayso kuna qorshayso dhaqdhaqaaqa gaarigaaga. Caadiyan, iskuday inaad eegto waxa dhacaaya 20 ilaa 30 sikin gudahood horta gaarigaaga.

### EEG GEESAHA

Geesaha fiiri si aad u xaqiijiso in gaariyaasha kale aysan hortaada ka goynayn wadada. Eeg geesaha garbahaaga ee dhanka danbe si aad u hubiso meelaha khataraha aan muuqan.

### GADAAL EEG.

U adeegso muraayadahaaga si aad ula socoto taraafiga kaa danbeeya. Waa muhiim inaad hubiso gaariyaasha kaa danbeeya marka aad badelayso laymanka, aad tartiibinayso ama aad joogsanayso, iyo marka aad gelayso isgoyska.

## MAARAYNTA XAWAARAHA

Gaari wadista amaanka leh ayaa ka dhigan inaad xawaaraha gaarigaaga waafajiso xaaladaha wadada iyo taraafiga, adoo bad ku filan u dhexeysiinaaya kuna dhaqmaaya xadiyada xawaaraha ee jira.

**Wado leexata** — Kahor intaadan gelin leexada, yaree xawaaraha si aad uga dhigto xawaare amaana ah oo kuu sahlaya inaad sheelare fudud oo joogto ah ku hayso inta aad marayso leexada. Sii yaree xawaaraha marka socodka gaariyaashu gaabis yahay, marka aad raacayso gaariyaal kale, iyo marka aadan arki karin dhammaadka leexada.



**Wadooyinka Sidibta ah** — Yaree xawaaraha marka koowaad ee aad aragto roob, baraf, roob baraf wata, ama baraf. Marka wadadu sidib tahay, taayiradaada ayaan si fiican u qabsan doonin. Waxay qaadan doontaa muddo dheer inaad joogsato, wayna adkaan doontaa inaad leexato adoon sinbiriiraqan. Haddii gaarigaagu bilaabo inuu sinbiqado, tartiib cagta uga qaad badhanka gaaska kadibna si tartiib ah u qabo bareegga. Markasta yaree xawaarehaaga oo sii bad dheeraad ah inta u dhexaya adiga iyo gaariga kaa horeeya haddii wadadu qoyan tahay ama uu baraf daboolo.



**Biyaha Wadada Jiifa** — Biyaha wadada jiifa ayaa dhici kara marka taayirada isteerinka ay bilaabaan inay ku dul socdaan biyaha, si lamid ah biyo ku kaxaynta gaariga. Sida ugu haboon ee la iska-ga ilaaliyo luminta xawaaraha ka dhasha biyaha wadada waa inaad tartiib u socoto marka aad marayso goobaha roobka iyo marka wadadu qoyan tahay kadib marka biyo soo galeen. Marka aad biyaha ku soconayso, si tartiib ah cagta uga dabci batoonka gaaska.

**Wadooyinka daadku maraayo** — Haku wadin gaariga waraha waawayn ee biyaha fadhiya wadada. Haddii aad aragto wado daad jiray, raadi meel kale oo aad marto.



## QAYBTA 8: Tilmaamaha Gaari Wadis Amaan ah

### MAARAYNTA MEESHA BANAAN

Waxaad wadada la wadaagi doontaa isticmaaleyaasha kaladuwan ee kale ee wadada. "Badka difaaca" waa badka aad u baneyso inta u dhexaysa gaarigaaga iyo dadka kale ee wadada isticmaalaaya - taasoo ku siineysa waqti aad falcelin ku bixiso. Markasta iskuday inaad bad amaan ah oo difaac u dhexaysiiso gaarigaaga iyo kuwa kale.

#### **Badka Joogsiga = Badka Difaaca**

Badka joogsiga waa badka gaarigaagu ku soconaayo, xaaladaha caadiga ah, laga bilaabo marka aad xaqiiqsato inay qasab tahay inaad joogsato ilaa marka gaarigaagu istaago. Dhawr waxyaabood ayaa saamayn kara badkaaga joogsiga:

**Xawaaraha** - Heerka aad ku safrayso. Inta inta xawaarahaagu sareeyo, ayuu badanayaa waqtiga iyo badka aad u baahan tahay si aad u joogsato.

**Waqtiga Fikirka** - Waa waqtiga iyo badka ay kugu qaadanayso inaad aqoonsato baahida joogsiga. Waqtiga guud ee fakarka darawal dhiifoon waa  $\frac{3}{4}$  sikin ilaa 1 sikin.

**Waqtiga Falcelinta** - Waqtiga iyo badka ay kugu qaadanayso inaad ka falceliso aadna lugtaada ka qaado badhanka gaaska, aadna biloowdo inaad bareegga qabato. Darawalka caadiga ah ayaa leh waqtiga falcelin oo dhan  $\frac{3}{4}$  sikin ilaa 1 sikin.

**Badka Bareegga** - Waqtiga iyo badka ay kugu qaadanayso inaad bareegga qabato si aad u tartiibiso ama u joojiso gaariga. Xawaaraha 50 mph ee wadada qalalan oo bareegyo wanaagsan leh, waxay qaadan kartaa bad dhan 158 fiid in la joogsado.

#### **Badka qaybta Hore**

Mar kasta iskuday inaad siiso *badka ugu yar* ee soo socda ee hal gaari 10 maly kasta oo aad safarto saacadii, ama afar sikin inta u dhexaysa gaarigaaga iyo gaariga kaa horeeya.

Go'aami badka dabagalka ee afarta sikin ah:

- Marka gadaasha gaariga kaa horeeya dhafo barta meeshii uu taagnaa, sida boorka ama baalaha, biloow inaad tiriso sikkinnada aad u baahan si aad u gaarto meesha uu ka dhaqaaya gaarigu - "kow kun koow, koow kun labo, koow kun sadex, koow kun afar.
- Aad ayaad ugu dhowdahay haddii aad dhaafto barta joogsiga kahortaan intaadan tirin afar sikin.
- Yaree xawaaraha kadibna markale ka tiri meel kale oo joogsi si aad u hubiso cabirka cusub. Ku celceli ilaa aad ilaa aadan gaariga u jirta bad ka yar afar sikin.
- Kadib marka aad ku tababarato qiyaasta inta sikin ee aad ka fogtahay sheeyga kadibna tiri sikkinnada ay qaadanayso inaad gaarto sheeyga si aad u aragto inaad saxnayd iyo inkale.

Waxaa jira xaalado gaar ah oo bad dheeri ah oo horta gaarigaaga loo baahan karo. Kordhi badbkaaga dabagalka marka:

- Aragu hoos u dhaco ama ay qariso hawadu (ceeryaamo, roob, baraf, iwm.), ama habaynkii.
- Aad ku socoto wado si sidib ah.
- Aad daba joogto gaariyaal waawayn sida taraagyada, basaska gaariyaasha dalxiiska, iyo gaariyaasha cagafka qaada.
- Aad dabo joogto gaari laga doonaayo inuu istaago isgoska wadada tareenka, sida basaska, ama gaariyaasha sida agabka khatarta badan.

## QAYBTA 8: Tilmaamaha Gaari Wadis Amaan ah

### Badka dhanka Geeska

Badka difaaca ee geesaha gaarigaaga ayaa yaraynaaya khatarta isku dhaca gaariyaasha adoo helaaya dookh aad midig ama bidix ugu leexato.

- Iska ilaali inaad gaari ku wado meel aad ugu dhow gaariyaasha kale muddo aad u badan. Waxaa laga yaabaa inaan darawalku ku arkin, waxayna yaraynaysaa badka aad u baahan tahay si aad iskaga ilaaliso isku dhaca.
- Iska ilaali inaad buux dhaafiso calaamadaha laynka dhexe. Iskuday inaad ka fogaato badka ugu badan ee macquulka ah inta u dhexaysa adigga iyo gaariyaasha kugusoo socda.
- Bad u bane gaariyaasha soo galaaya laymanka badan ama ama wadada gelitaankeedu adag yahay adoo u leexanaaya dhanka laynka ama wax ka badelaaya xaawaraahaaga.
- Sii bad dheeri ah dadka lugaynaaya, gaar ahaanna carruurta, iyo baaskiileeyda.
- Marka gaariga ku baasaaya uu yahay tareele, sii bad dheeri ah adoo aadaaya dhanka qaybta laynkaaga ka banaan, ee ka fog gaariga tareelaha ah ee ku dhaafaaya.

### Badka kaa Danbeeya

Maaha wax fudud in la ilaaliyo badka dabagalka ee gadaasha gaarigaaga. Hase yeeshee, waxaad ka caawin kartaa darawalka kaa danbeeya inuu bad amaan ah kuu jirsado adoo xawaaraha dhimaaya, xili hore u digaaya, kana siinaaya bad dheeraad ah horta gaarigaaga kahor intaadan yarayn xawaaraha ama leexan.

## WADA HADALKA

### U muujinta Dadka kale ee Meesha Marayso

Adaa masuul ka ah inaad gaarigaaga tusto dadka kalee wadada gaariga ku wada.

**Adeegso Nalalka Hore** — Sharciga Ohio ayaa qasab ka dhigaaya in nalalka hore ay shidnaadaan qorax dhac ilaa qorax soo bax, mar kasta oo aragu daciif yahay (roob da'aayo, baraf dhacaayo, ceeryaamo jirto, iwm.), iyo xili kasta oo gacannada muraayadaha sifeeya la isticmaalaayo sabab la xariirta wasaqda fuushay muraayada. Nalalka iftiinka badan ayaa la adeegsan karaa xili kasta oo nalalka hore shidhan yihiin marka laga reebo marka gaari kale kugusoo socdo.



**Adeegsiga Hoonkaaga** — Hoonka gaari, marka si sax ah loo adeegsado, ayaa loo adeegsaa karaa in loo digo dadka kale ee wadada isticmaalaaya. Tartiib u taabo hoonkaaga si aad ula hadasho dadka kale marka:

- Dadka lugaynaaya ama baaskiileeyda u muuqda inay laynkaaga kusoo socdaan:
- Darawal aad baasayso oo bilaabay inuu laynkaaga soo galo.
- Marka aan darawal ka feejignayn ama uu dhib ku qabo inuu ku arko.



**Marka aadan Isticmaalayn Hoonka** — Keliya isticmaal hoonkaaga marka aad u baahan tahay inaad la hadasho dadka kale ee wadada isticmaalaaya U adeegsiga hoonkaaga qaab khaldan ayaa cabsi ama caro gelin karta dadka kale ee wadada isticmaalaaya.

### Muujinta meesha aad U socoto

**Digniini bixi Kahor intaadan Badelin Jihadaada** — digniini sax ah ayaa siinaysa isticmaaleyaasha kale ee wadada waqti ay uga falceliyaan dhaqdhaqaaqa gaarigaaga. Adeegso digniinta leexashada marka aad badalayso laymanka, marka aad galayso wado kale, ama marka aad u leexanayso bidix ama midig. Muuji leexashada ugu yaraan 100 fiid kahor meesha aad ka leexanayso. Xaqiiji inaad damiso nalalkaaga si aad iskaga ilaaliso inaad wareeriso darawallada kale.

**Fareejo bixi marka aad Yaraynayso Xawaaraha** — Nalalka bareegga ayaa u sheegaaya dadka kale ee wadada maraaya inay ogaadaan in gaari uu tartiib u soconayo ama istaagi rabo. Adeegso fareejooyinka leexashada kahor intaadan yarayn xawaaraha marka:

- Aad ka leexanayso wadada aan aan lahayn meel loo leexdo oo gaar ah ama layman horay u jiray.
- Aad baarkin galayso ama leexanayso kahor intaan isgoyska la gaarin.

**QAYBTA 8: Tilmaamaha Gaari Wadis Amaan ah****KAHORTAGA DHAAWACA KA DHASHA GAARIYAASHA KULUL****Carruurta**

Ku dhawaad 38 carruur ah ayaa sanad kasta Maraykanka ugu dhinta sitarooma kulaylka gaariga, sida ay sheegeen [KidsAndCars.org](http://KidsAndCars.org) iyo [NoHeatStroke.org](http://NoHeatStroke.org).

**Kormeerka** – Marna ilmo keligood ha uga dhex tagin gudaha, ama aaga gaariyaasha!

**Fiiri kahor Intaadan Xirin** – Dabeecad ka dhigo inaad eegto gadaashaada kahor intaadan xirin albaabada. (Look Before You Lock™ waa Ol-ole ay wado KidsandCars.org™)



**Xasuusinnada** – Abuur xasusin si aad u hubiso dhabarka danbe ee kuraasta. Xasuusinnada waxaa kamid ah:

- Inaad ku dhaafto alaab aad u baahan tahay kursiga danbe, sida boorsadaada, boorsada gacanta, taleefanka, kaarka shaqaalaha, iwm.
- Dhig xayawaan boonbale ah kursiga hore ee gaariga si aad u abuurto xasusin muuqaal ah.


**Samayso "Xeerka Dejinta"** – Ka codso daryeel bixiyaasha daryeelka ilmahaaga inay kulasoo xariiraan haddii ilmahaagu uusan imaan waqtigii loo cayimay.

**Xir Gaarigaaga** – Abuur dabeecad aad markasta ku xirto albaabada gaarigaaga iyo gadaasha danbe, sanadka oo dhan. Waydii adeeg bixiyaha daryeelkaaga, saaxiibada, iyo dariska inay isla sidaan sameeyaan.

**Ilmo Maqan** – IHaddii ilmo uu maqan yahay, fiiri qaybaha gaariga laga raaco iyo dabada danbe dhammaan gaariyaasha aaga yaala, xataa haddii ay xiran yihiin. Ilmaha ayaa xiri kara albaabka kadib marka uu galo.

**Talaabo Qaad!** – Haddii aad ilmo keligiis ku jira gaari aragto:

- Wac 911 isla markaba. Fiiri albaabo aan la xirin oo iskuday inaad hesho waalidka inta aad wicitaanka dirayso.
- Haddii ilmuhu u muuqdo mid xanuun dareemaya ama uusan dhaqdhaqaaq lahayn, qaad talaabo aad ilmaha ugasoo saarayso gaariga. Jabi daaqaada haddii loo baahdo. Goballo badan, uuna ku jiro Ohio, ayaa leh sharciyada "Good Samaritan" kuwaasoo ka difaacaya dadka dacwadaha maxkamada kadib markii ay ka jawaabaan xaalad degdeg ah.
- La joog ilmaha ilaa caawimaad timaado.

**Xayawaannada rabaayada ah**

Xasuusnoow "saaxiibadaada xoolaha ah" sidoo kale, oo haku ilaawin gaarigaaga. Xataa haddii daaqaduhu jaban yihiin, heerkulka gudaha gaariga ayaa kordhi kara 20 digrii (Fahrenheit) 10 daqiiqo gudahood.



## QAYBTA 9: Wadaagista Wadada

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu wadada maro. Xasuusnoow inaad noqoto qof qadarin badan oo muuji inaad joogto iyo inaad iska ilaaliso shilalka.

### DADKA LUGAYNAAYA

Dadka lugaynaaya ayay adkaan kartaa in la arko waxaana adkaan karta in la go'aansho meesha ay u socdaan. Dadka lugaynaaya ayaan mar kasta ku dhaqmin tilmaamaha wadada ama aan ku socon meelaha loo asteeyay lugta, marka ka darawal ahaan, waa inaad boos siisaa dadka lugaynaaya.



#### Digniin:

- Dadka lugaynaaya ee aragooda ama maqalkoodu naafada yahay \*sida usha cad ama adeegsanaaya eeyga hagaaya) ayaa xaq u leh inay wadada maraan.
- Boos sii dadka lugaynaaya marka aad leexanayso.
- Ka feejignoow dadka lugaynaaya ee u dhow meelaha gaariyaasha baarkiman ama taagan.
- Eeg dadka lugaynaaya iyo walxaha kale kahor intaadan gadaal u bixin.
- Iska ilaali garoonada ciyaaraha iyo aagaga xaafadaha. U diyaar garoow joogsi degdeg ah.
- Aagaga Dugsiyada - Marka nalalku ay falaash bixinayaan ama carruurto ay joogaan, waa inaad raacdaa xadka xawaaraha hooseeya. Raac *Hageyaasha Jid Goynta* ee dhammaan isgoysyada u dhow dugsiyada.



### QAYBTA 9:

- DADKA LUGAYNAAYA
- DARAWALLADA MOOTADA
- BAASKIILEEYDA
- GAARIYAASHA GANACSIGA
- BAABUURTA GARGAARKA DEGDEG AH
- SHARCIYADA JOOGSIGA
- GAARIYAASHA TARTIIB U SOCDA




### WADEYAASHA MOTOOYINKA

Darawallada mootada ayaa leh isla xuquuqda iyo waajibadka darawallada kale. Hase yeeshee, waxaa sii adkaan karta in la arko. Waxaa jira xaalado gaar ah iyo marxalado aan u baahan nahay inaan feejignaano si aan qaab badqab leh ula wadaagno wadada darawallada mootooleeyda ah:

- Sii mootooleeyda badka layn buuxa; badka ayay ugu baahan yihiin bootooleeydu si ay uga falceliyaan gaadiidka kale.
- Xasuusnoow in mootooleeydu ay qayb ka noqon karaan isku dhafka tarafiga. Markasta fiiri muraayad haadkaaga iyo meelaha ay kaaga qarsoomi karaan.
- Mootooleeydu waxay u baahan yihiin badka joogsiga oo ka badan kan gaariyaasha iyo gaadiidka kale ee rakaabka.
- Ha iska malaynin in mootadu ay leexanayso marka aad aragto ayadoo shidaysa nalka leexashada. Nalalka leexashada ee mootada ayaa laga yaabaa inaysan iskeed u damin, waxaana laga yaabaa in mooto waduhu ilaaway inuu damiyo.
- Marka aad dabo galayso mootoole, sii ugu yaraan 4 sakin oo badka gadaashiisa ah ama ka badan marka roob da'aayo, ama haddii kale ma heli doonin waqti kugu filan oo aad iskaga ilaaliso isku dhac,
- Darawallada mootada ayaa degdeg ugu baahan kara inay badelaan xawaaraha ama badelaan laynka ay ku socdaan si ay iskaga ilaaliyaan khataraha sida duleellada, jaayga, meelaa qoyan ama lagu sinbiqanaayo, askariyada jiifa, isgoysyada wadada tareenka, iyo marinka dhagaxaanta ah, kaasoo ay ku dhiman karaan mooto wadeyaashu.

**QAYBTA 9: Wadaagista Wadada**

# SII 3 FIID, WAA SHARCI

**WADEYAASHA BAASKIILADA - ORC 4511.52**

Baaskiilada waxaa loo arkaa gaariyaal marka ay marayaan wadooyinka waana inay la socdaan, maaha inay ka hor yimaadaan, gaariyaasha kale.

Baaskiileeyda ayaa laga doonayaa lagana filayaa inay:


- Ku dhaqmaan calaamadaha wadada, digniinaha, iyo astaamaha ku qoran wadada.
- Inay raacaan isla xeerarka wadada ee ay raacayaan gaariyaasha matoorka ku shaqeeya.

Ka darawal ahaan - ka feejignoow baaskiileeyda:


- Tartiib u soco marka aad kusoo socoto ama dhaafayso baaskiile
- Iska ilaali inaad hoonkaaga meel u dhow ku yeeriso baaskiilaha.
- Keliya dhaaf baaskiilalaha marka ay ammaan tahay dhaafitaanku.
- Ka fogoow aaga badqabka oo dhan ugu yaraan sadex fiid inta u dhexaysa gaariga matoorka ah iyo baaskiilka.
- Iska ilaali inaad qaab soo boodo ah ugu leexato horta baaskiilaha oo haku qasbin baaskiilaha inuu wadada ka baxo.



- Si gaar ah uga taxadar marka aad ag marayso baaskiileeyda marka wadadu qoyan tahay ama ay ciid ama jaay ka buuxdo. Xaaladahaan ayaa saamaynaaya baaskiileeyda in kabadan intay saamaynayaan gaariyaasha matoorka ah.
- Fiiri baaskiileey ku jirta wadadaada kahor intaadan gadaal u bixin.
- Baro calaamadaha digniinta baaskiilaha ee gacanta. Haddii aan baaskiileeydu aysan digniin bixin karin, raadi tusmooyin kale sida inay madaxa leexshaan ama ay garabkooda eegaan kahor intaan badelin laymanka.



LEEXASHADA BIDIX

JOOGSIGA  
AMA TARTIIB U SOCOSHADALEEXASHADA MIDIG  
(DIGNIINTA DHANKA BIDIX)LEEXASHADA MIDIG  
(DIGNIINTA DHANKA MIDIG)

## QAYBTA 9: Wadaagista Wadada

### GAARIYADA GANACSIGA

Shilal badan oo ka dhex dhaca gaariyaasha rakaabka iyo kuwa ganacsiga ayaa la iska ilaalin karaa. Xasuuusnoow xadiyada taraaga adoo qodobadaan niyada ku haynaaya:

- Gaariyaasha ganacsiga ayaa caadiyan ka balaaran kana dhib badan wadista gaariyaasha rakaabka.
- Gaariyaashaan ayaa leh balac wayn oo qarinaaya waxyaabaha u dhowdhow in ka badan gaariyaasha rakaabka.
- Waxay leyihiin badadka joogsiga iyo sheelaraynta oo ka badan kuwa kale waxayna u baahan yihiin bad wayn si ay u leexdaan.

## HA MARIN LAYN KHALDAN



### Leexashada

Sii gaariyaasha waawayn bad wayn oo ay ku leexdaan. Taraagyada ama basaska ayaa dhanka midig u leexan kara ayagoo kasoo leexanaaya laynka midix si ay u baneeyaan geeska leexada wadada ama waxyaabaha kale ee ku horgudban. Ha kala dhexgelin gaariga wayn iyo marinka, maadaama ay keenayso burburin xun. U daa gaariga wayn ha leexdee asagoo galaaya laynka.

Mar kasta istaag gadaasha laymanka joogsiga ee isgoyska. Laymankaan joogsiga ayaa loogu talagalay inay kugu ceshaan gadaasha isgoyska si aad gaariyaasha waawayn u siiso meel wayn oo ay ka leexdaan.

Burbur badan oo ku dhaca gaariyaasha waawayn ee maraaya isgoysyada maadaama gaarileeydu ay khalad u fahmaan xawaaraha taraaga ku soo socda. Marka aad ka shakido xawaaraha taraag soo socda ama bas, ha u leexan dhanka bidix ee jidkiisa. Taraagyada iyo basaska ayaa qaadan kara muddo ka badan gaariyaasha yaryar inay istaagaan.

Ha isku horgoyn gaari wayn oo wadada haya ama ku socda jidka wayn si aad u gaarto bixitaanka ama u leexato, ama aad taraaga uga hormato laynka keligiis ah ee aaga dhismaha. Dhawrka sikin ee la kaydin karo uma qalmaan inaad naftaada u haligto.

## LEEXASHOYINKA AAGA BALAARAN



## QAYBTA 9: Wadaagista Wadada

### "Aaga Lama maraanka ah"

"Aaga Lama Maraanka ah" waa aaga u dhow gaariyaasha waawayn iyo basaska marka gaariyaashu ku qarsoomaan darawalka oo loo yaqaano "meelaha qarsoon." Meelahaan qarsoon ayaa ah geesaha, gadaasha, iyo horta gaariga wayn. Xasuusnoow: hadba inta taraagu wayn yahay, ayay sii badan tahay qarsoodiisa.


#### Geeska Aaga lama Galaanka –

Taraagyada waawayn iyo basaska ayaa leh "Aagaga lama Galaanka" ee waawayn ee labada dhinacba ah. Aad ayay uga balaaran yihiin meelaha aan la arkayn ee gaarigaaga. Haddii aadan arki karin wajiga darawalka ee geeska muraayada, darawalka ayaan asna ku arkayn. Iska ilaali inaad socoto geeska gaariga wayn muddo ka badan inta ay qasabka ka dhigaan marxaladaha jira. Haddii darawalku u baahan yahay inuu leexdo ama badelo laynka, fursadaha isku dhaca ayaa aad u badan.

**Aaga Lama Galaanka ee Hore** – Sabab la xariirta xajmiga iyo miisaanka gaariga wayn, waxay qaadanaayso muddo ka badan gaariyaasha rakaabka inuu istaago. Taraag xamuul ka buuxo oo leh taayiro wanaagsan iyo bareeyo si fiican u shaqaynaaya, ee ku jira xaalado caadi ah, kuna socda xawaare dhan 55 mph ayaa u baahan ugu yaraan 335 fiid kahor intuusan si buuxda u istaagin, ama in ka badan 1½ jeer badka istaagista gaariga rakaabku u baahan yahay. Marka aad baasayso gaari wayn, eeg horta gaariga oo dhan adoo adeegsanaaya muraayad haadkaaga danbe kahor intaadan gaariga ku celin wadada kuna soconaya xawaaraha.

#### Qaybta danbe ee Aaga Lama

**Galaanka** – Si ka duwan gaariyaasha rakaabka, gaariyaasha waawayn ayaa leh aagaga qarsoodiga ah oo wayn oo ka danbeeya oo gaaraaya ilaa 200 fiid. Iska ilaali inaad gaariyaasha aad uga dabo dhawaato. Haddii aad ugu dhowdahay, gaariga wayn ayaan arki doonin gaarigaaga rakaabka, adiguna ma arki kartid waxa ka horeeya. Dhig gaarigaaga si darawalku kaaga arko muraayadaha geeska. Iska ilaali laymanka midig marka aad taag fuulayso ama kasoo deganayso adoo dabo jooga gaari wayn ama meelaha u dhow xarumaha taraaga markaas oo gaariyaasha waawayn ay isku dayi karaan inay galaan taraafiga xawliga ku socda. Marka aad iska ilaaliso laynka midig ee goobahaan, waxaad yarayn doontaa suuragalnimada isku dhaca.





## QAYBTA 9: Wadaagista Wadada

### GAARIYADA GURMADKA DEGDEGA AH (BOOLIISKA, DAB DAMISKA, GAARIYADA CAAFIMAADKA)

Marka gaariyaasha gurmada degdega ah ee muujinaaya nalalka falaashka iyo seeriga dhawaaqaaya leh iyo/ama digniinaha ay kusoo socdaan wadada, darawalku waa inuu si degdeg ah oo badqab leh — ugu baxaa dhanka midig ee wadada uuna istaagaa. Iska ilaali xanibida isgoysyada. Dhammaan baabuurta waa inay baaqi ku ahaadaan halkan ilaa iyo inta gaadhiga gargaarka degdegi ahi dhaafayo ama marka sarkaal sharci fulin ahi dhinac kale kuu leexiyo.

### SHARCIYADA JOOGSIGA

Sharciga Ohio ayaa ka doonaaya dhammaan darawallada inay ku socdaan laynka ka horeeya iyo/ama ay tartiibsadaan marka ay kusoo dhawaadaan gaariga booliiska ee taagan, gaari kale oo gurmada degdeg ah baxsha (sida gaariga dab damiska), gaariga adeegga wadada (sida taraaga xashka ama barafka aruurinaaya), gaariga qashinka aruursha, gaariga dayactirka jidwaynaha, ama gudiga adeegga dadwaynaha marka gaariyaashaan ay leeyihiin nalalkooda digniinta oo shidan. Gobal kasta oo ku yaalla Maraykanka wuxuu leeyahay sharciga *Joogsiga*.

Marka aad kusoo dhawaato joogsiga gaari sharci ah oo taagan geeska wadada, horay u sii soco adoo feejigan. Tartiib u soco oo xaqa wadada sii adoo u leexanaaya layka dhanka aan ku xigin gaariga haddii ay badqab tahay xaaladaha wadaduna sahlayaan. Haddii badelida laynku aysan amaan ahayn, tartiib u soco oo ku soco qaab taxadar leh adoo joogtaynaaya xawaaraha amaanka ah ee xaaladaha tarafiga.




### GAARIYADA TARTIIB KU SOCDA – ORC 4511.31



Iska ilaali gaariyaasha tartiib u socda, gaar ahaanna deegaannada miyiga ah. Sadex geesoodka cad ama oranjiga ama casaanka wirqaaya ee ka muuqda gadaasha gaariyaasha ee qaada xoolaha, qalabka beeraha, iyo qalabka dhismaha ayaa ka dhigan in gaarigu uu ku socdo xawaare ka hooseeya 25 mph. Baabuurta u socota si ka qumaatidan baabuurta kale waa inuu isticmaalaa haadka midigta ee la heli karo ama uu aad ugu dhawaadaa dhinaca midigta ama cidhifka jid waynaha. Taxadar marka aad baasayso. Waxaa laguugu ogol yahay inaad ka gudubto laynka midabka jaallaha xariirsan leh si aad u baasto gaari nuutaxaaya ilaa inta gaarigu uu ku soconaa nus kamid ah xadiga xawaaraha meesha ku oqran, ha dhaafin xadkaas xawaaraha marka aad baasayso, ayna jirto bad kugu filan oo banaan oo aad laynka hore ee aad ku baasayso ka helayso.

**Mashiinnada Beerta** — Iska ilaali gaariyaasha beeraha, gaadiidka isku dhafan, iyo noocyada kale ee qalabka beeraha ee maraaya wadada kuna socda wadooyinka waawayn ee gobalka ee deegaannada miyiga ah. Si feejigan u baas oo xasuusnoow in darawalka mashiinka beeraha uusan maqli karin gaariyaal ku soo socda. Mashiinnada beeraha waa in lagusoo bandhigaa nalka tartiib u socoshada, waana inay adeegsadaan nalka falaashka cas habaynkii.

**Gaariyaasha Xoolaha Soo aruuriya iyo Gaariyaasha Qaada Xoolaha** — Deegaannada miyiga qaarkood, waxaa laga yaabaa inaad wadada la wadaagto gaariyaasha aruuriya xayawaannada iyo gaariyaasha xoolaha, kuwaasoo leh isla xaquuqda gaariga maatoorka ah ayna qasab tahay inay raacaan isla xeerarka wadada. Calaamadaha Digniinta ayaa lagusoo dhajin doonaa aagaga aad u badan tahay inaad ka hesho gaariyaasha qaada xayawaannada iyo kuwa xoolaha qaada, marka feejignoow.



**QAYBTA 10: Xaaladaha Degdega ah****ISKA ILAALINTA SHILALKA**

Dhammaan darawallada ayaa mar uun arki doona ayagoo ku dhex jira xaalad degdeg ah. Si kasta oo aad u taxadareyso, waxaa jira xaalado keenaaya dhibaatooyin. Haddii aad diyaar garoowdo, waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad ka hortagto natiijooyin kasta oo daran. Dhammaan daawallada ayaa masuul ka ah kahortaga shilalka.

**QAYBTA 10:**

- ISKA ILAALINTA SHILALKA
- CILADAHA KU DHACA GAARIGA
- MARKA GAARIGU MEEL KU DHACO

**Bareeg qabashada**

Falcelinta koowaad ee inta badan darawalladu baxshaan si ay uga hortagaan shilka waa inay gaariga joojiyaan. Inta badan gaariyaasha cusub ayaa ku qalabaysan ABS (nidaamka bareegga ee kahortaga xirmida) si loo joojiyo gaarigaaga adon sinbiqan (akhri buuga tasmada mulkiilaha gaariga si aad u hesho xogta rasmiga ah ee bareegga).

**Isteerinka**


Waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad iska ilaaliso shilka adoo si degdega ah uga leexanaaya dhibaata. Tan waxaa mararka qaar loogu yeeraa "isteerinka". Ku qabo isteerinka labada gacmoodba una wareeji jihada aad doonayso si aad uga fogaato gaariyaasha kale. Isteerinka u wareeji dhanka kasoo horjeeda si aad u xoojiso gaarigaaga, u xakamayso, adna u biloowdo inaad tartiibiso.

**Sheelaraynta**


Waxaa muhiim noqon karta inaad gaariga sheelarayso si aad uga cararto shilka. Arintaan ayaa dhici karta marka gaari kale uu kugusoo dhawyahay inuu kugu dhaco asagoo kaaga imaanaaya gadaal.

**Bariiqashada**

Bariiqashada waxaa keena marka aad xawaare dheereeya ku socoto xaaladaha, marka aad degdeg u istaagto, ama marka taayiradu aysan qabsanayn wadada. Marka aad biloowdo in gaarigu sinbiqado, cadaadiska ka qaad bareegga ama sheelaraha una leexi taayirka dhanka sinbiqada.

**Nalalka Canbarka ah ee Taraafiga**

Mararka qaar, bakhtiga dabka ayaa keeni kara signal taraafig oo aan shaqaynayn. Sharcigan, marka laga reebo marka sarkaal sharci fulin ahi joogo, darawaladu waa in signalka taraafiga ee xumaaday u tixgeliyaan waddo afar ah oo la istago. Si taxadar leh ku gal isgoyska, maadaama laga yaabo inaan darawallada kale joogsan.

**Godadka ku Yaala Wadada**

Godadka ku yala wadada ayaa keeni kara shilal xun. Haddii gaarigaagu ka baxo wado laami ah, ka qaad sheelaraha, si tariib ah u qabooji, marka ay badqab leedahayna, ku laabo wadada.

## QAYBTA 10: Xaaladaha Degdega ah

### CILADA GAARIGA

Mar kasta waxaa jirta fursad gaari cilad ku geli karto inta aad wado. Raac jadwalka dayactirka lagu taliyay ee ku qoran buugga tusmada mulkiilaha ee gaariga. Marka cilad dhacdo, raac habraacyadaan oo raadso caawimaad:

#### Fashilka Bareegga

Haddii bareegaagu fashilmo intaad gaariga wado:

- Adeegso bareegga baarkinka - soo jiid gacanka bareegga baarkinka ama cagta ku riix batoonka bareegga baarkinka si tartiib ah si aadan u xirin taayirada danbe oo aadan u abuurin in gaarigu bariiqdo.
- Haddii aan taasi shaqayn, dami matoorka, ka bixi gaariga wadada, kadibna shid nalalka xaalada degdega ah.



#### Sheelaraaha Ku dhaga

Haddii sheelaraaha gaarigaagu isku dhex yaaco:

- Dami matoorka.
- U bood batoonka "NEUTRAL" kadibna raadso meel aad wadada uga baxdo.
- Si tartiib ah u wareeji isteerinka, bareega ugu qabo tartiib, kadibna gees uga bax wadada.

#### Qaraxa Taayirka

Haddii **taayirka hore** qarxo, gaariga ayaa si u boodaaya si xawli ah una boodaaya dhanka taayirka qarxay.

Haddii **taayir danbe** qarxo, gaariga ayaa u habsanaaya, ruxmaaya, una boodaaya qay ahaan jihada taayirka qarxay.

- Xoog u qabo siteerinka kuna celi gaariga inuu horay u socdo.
- Ha qaban bareegga; si tartiib ah u qabooji gaariga.
- Ka bax wadada oo aad meel amaan ah kadibna daar nalalka khatarta.
- U bedel batoonka "PARK", dami matoorka.



#### Fashilka Matoorka

Haddii matoorku damo adoo gaariga wada:

- Xaji isteerinka. Ogoow in ay adkaan karto in la wareejiyo isteerinka, laakiin waad wareejin kartaa.
- Ku qabo bareeg awood tartiib ah, qabooji, oo ka bax wadada.
- U badel batoonka "PARK". Iskuday inaad dib u kiciso matoorka. Haddii uu fashilmo, kor u qaad gaashaanka oo shid nalalka xaalada degdega ah.

#### Jabka Gaariga

Haddii gaarigaagu jabo:

- Ka bixi gaarigaaga wadada oo ka fogee taraafiga, haddii ay suuragalayso.
- Daar nalalkaaga xaalada degdega ah si aad u muujiso in gaarigu fariistay.
- Iskuday inaad u digto isticmaaleyaasha kale ee wadada in gaarigu uu meesha ku jabay. Haddii ay suuragalayso, saar nalalka xaalada degdega ah meel u jirta 200 ilaa 300 oo fiid gadaasha gaarig. Tani waxay digniin siinaysaa darawallada kale, ayadoo siinaysa waqti ay ku badelaan laynka ('u leexdaan').
- La joog gaarigaaga ilaa caawimaad kaasoo gaaryso.

## QAYBTA 10: Xaaladaha Degdega ah

### MARKA SHIL DHACO - ORC 4509.01, 4509.06, 4549.02, 4549.021, IYO 4549.03

Haddii shil ku galo, gaariga ka saar wadada ilaa inta aad karto. Haddii aadan dhaqaajin karin gaariga, xaqiiji in nalalka khatarta aad shido aadna meesha dhigto digniinaha wadooyinka haddii aad haysato.

#### Isdeji oo Joog goobta

- Joogso oo qaad talaabooyin degdeg ah si aad ugu digto gaariyaasha soo socda. Shid nalalkaaga digniinta. Shilalka fudud, haddii ay suuragalayso ayna badqab tahay in sidaas la yeelo, ka saar gaarigaaga wadada.
- Isdeji intaad awoodo oo iska ilaali muran kasta.
- Haka bixinina meesha ilaa aad isdhaafsataan xariirada iyo xogta caymiska dadka shilka qaybta ka ahaa, taasoo ay ku jirto inaad qoraal reebtaan haddii gaariga waxyeeladu gaartay aysan cidna saarnayn.

#### Hubi in Dhaawacyo Jiraan oo Codso Caawimaad

- Ka fiiri naftaada iyo dadka kale wax dhaawacyo ah.
- Wac adeegyada gurmada degdega ah (911) haddii uu jiro qof dhaawacmay.
- Ha qaadin dadka dhaawacmay; ku hay diiranaan.
- Ogeysii mas'uuliyiinta ay qusayso — midkoodba Ilaalada Wadooyinka Gobolka Ohio, Shariifka ama booliiska degaanka.

#### Xogta Shilka iyo Xogta Xariirka

- Xogta isdhaafsada dadka kale ee shilka qaybta ka ahaa, laakiin haka doodina cida khaladka leh ama waxa caymisku daboolaaayo. Sii iyo/ama ka qaado:
  - Magacyada iyo ciwaannada dadka qaybta ka ahaa ama dadka goobjooga u ahaa shilka
  - Magaca iyo xogta xariirka mulkiilaha gaariga haddii uusan qayb ka ahayn/joogin
  - Lambarka taarikada gaariga iyo meesha lagu sameeyay iyo nooca gaariga shilka galay
  - Magaca, ciwaanka, iyo lambarka qorshaha ee shirkada caymiska
- Xog ka qaado xaaladaha keenay shilka, sida taxanaha dhacdada, cimilada, xaaladaha wadada, iyo maamulka taraafikada.
- Ka jawaab dhammaan su'aalaha saraakiisha baaritaanka, laakiin ha kala hadlin cid kale shilka.

#### Soo sheeg Shilka

- Shirkadaada caymiska u ogaysii sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah.
- Haddii shilka uu ka mid yahay gaadhi aan cidid saarnayn, waa inaad u warisaa shilka booliiska ama aad ka tagtaa macluumaadka lagama maarmaanka u ah muuqaalka.
- Darawalka gaariga qaybta ka ahaa shilka gaariga matoorka ku shaqeeya ee gudaha Ohio ka dhacay ayaa u soo gudbin kara [Warbixinta Shilka](#) (foomka BMV 3303) Laanta Gaariyaasha Matoorka Ku shaqeeya ee Ohio **lix bilood gudahood** kadib marka shilku dhacay haddii waxyaabaha soo socda ay dhaceen:
  - Wuu jiray waxyeelo ka badan \$400, ama dhaawac qofeed; iyo
  - Darawalka ama mulkiilaha gaariga kale uusan haysan caymis ama daboolid kale oo masuuliyada dhaqaalaha ah markii shilku dhacay.



**QAYBTA 11: Qaadashada Imtaxaanka Darawalka****IMTAXAANKA DARAWALNIMADA IYO XIRFADAHA WADADA**

Marka darawal uu kalsooni ku qabo awoodiisa lana buuxsho dhammaan shuruudaha, waxaa la joogaa waqtigii imtaxaanaadka darawalnimada iyo aqoonta wadada! Imtaxaanka darawalnimada ka mudayso barta oonlaynka ah oo ah [www.ohiodrivingtest.com](http://www.ohiodrivingtest.com) ama si toos ah uga mudayso [Xarunta Imtaxaanaadka Darawalka](#). Goobaha imtaxaanka ee la qorsheeyay ayadoo la kaashanaayo Ohio BMV ayaa sharciyad u leh inay qaadaan qarashaadka lagu daboolaaayo bixinta imtaxaanka xirfadaha.

Codsaduhu waa inuu keenaa TIPIC giisa iyo, haddii uu ka yar yahay 18 sano waa inuu keenaa shahaadada waxbarashada darawalnimada iyo foomka nootaayaysan ee [Marqaati Kaca Kontonka Saacadood](#) (foomka BMW 5791).

Codsadeyaasha waa inay sidoo kale la yimaadaan gaari wanaagsan oo ay imtaxaanka ku galaan. Kormeerka gaariga oo la sameeyo kahor intaan imtaxaanku bilaaban, hubinta inay si fiican u shaqaynayaan nalalka digniinaha, nalalka bareegga, hoonka, sifeeyaasha muraayada hore, iyo nalalka hore. Alabaabada hore waa inay awoodaan in laga furo gudaha iyo banaanka ayna leeyihiin gacanka albaabka. Diiwaan gelinta gaariga waa inay noqotaa mid hadda shaqaynaysa laguna muujiyaa taarikada gaariga.

**Caawimaadaha Naafada:**


*La xariir [Xarunta Imtaxaanka Darawalka](#) si aad u samayso imtaxaanka aqoonta iyo/ama u hesho adeegyada imtaxaanka darawalka.*

**Imtaxanaka Aqoonta Gaari Wadista**

Nooca xirfadaha darawalnimada ayaa lagu qiimeeyaa koorso lagu astaynaayo shan astaamood. Dhibcaha looga jarto joogsiga, bamamka, si khaldan u cabirida badka joogsiga, iyo inaan qofku la simin aaga imtaxanaka. Waa fashil degdeg ah haddii darawalku uu dulmaro ama uu ku dhaco calaamad, uu calaamad ka bixiyo meeshii loogu talagalay, ama talaabo kale oo khatar ah qaado.

**■ IMTAXAANKA DARAWALNIMADA — TALAABADA KOOWAAD:**

- Horay u soco ilaa 9 fuud x 20 fuud oo lagu asteeyay afar calaamadeeye. Cabirada waxaa lagasoo qaadaa calaamadeeyaha dhexda.
- Imtaxaan Qaadaha Darawalka ayaa kugu hagaaya inaad isteerinka u leexiso dhanka midig ama bixid ee calaamadeeyaha dhexe.




## QAYBTA 11: Qaadashada Imtaxaanka Darawalka

- Horay u soco oo joogso marka bambarka gadaale ee gaarigu uu la siman yahay calaamadeeyaha dhexe uuna caadiyan la siman yahay koorsada.

### ■ IMTAXAANKA DARAWALNIMADA — TALAABADA LABAAD:

- Laga bilaabo meesha aad taagan tahay ee dhammaadka Tlaaabada Koowaad, gadaal u soo bax adoo soo maraaya calaamadeeyaha dhexe. Toosi gaariga oo gadaal u bax adoo maraaya koorsada, kuna joogsanaaya bambarka hore xataa labada calaamadeeyey ee danbe ay si guud la siman yihiin koorsada.



- Ka saar gaariga aaga imtaxaanka koorsada adoon ku dul socon calaamada ama samayn ficil kale oo imtaxaanka kugu ridaaya.

## Imtaxaanka Tijaabada Wadada

Imtaxaan Qaadaha Darawalka ayaa qiimaynaaya xirfadaha gaari wadista asagoo saaran kursiga hore ee rakaabka ee gaariga. Imtaxaan qaadaha darawalka ayaa tilmaamaha safarka siinaaya darawalka.

Inta lagu jiro qiimaynta, talaabooyinka ayaa la samayn doonaa lana qiimayn doonaa:

- |                              |   |   |
|------------------------------|---|---|
| – Jooji oo kici gaariga      | – Samee leexashooyin                    | – Ku wad laynka saxda ah                |
| – Soo wareeg oo gadaal u bax | – Adeegso nalalka leexashada ee gaariga | – Ku soco badka amaanka ah ee dabagalka |

## Fashilka Imtaxaanka

**Ilmaha kayar 18** – Codsadeyaashu waa inay sugaan labo maalmood kahor intaysan markale gelin imtaxaanka.

**Da'aha 18 iyo ka Wayn** – Ka fiiri xogta *koorsada Tababarka Darawalka Dadka waawayn ee lasoo Gaabshay* bogga xiga. Codsade jira 18 ama ka wayn, kaasoo aan waligiis qaadan Ruqsada Darawalka, kuna dhaca imtaxaanka wadada iyo gaari wadista ee imtaxaanka darawalka, ayaa laga doonayaa inuu qaato *koorsada Tababarka Darawalka Dadka waawayn ee lasoo Gaabshay* kahor intuu isku dayin imtaxaanka darawalnimada mar labaad. Haddii codsade uu haystay koorsada waxbarashada darawalka oo la aqoonsan yahay oo uu qaatay sanad gudihiis imtaxaanka kahor, lagama doonaayo inuu qaato *koorsada Tababarka Darawalka Dadka waawayn ee lasoo Gaabshay*. Cadaynta waxbarashada darawalka ee la aqoonsan yahay ayaa la keeni doonaa kahor intaan imtaxaanka lagu celin mar labaad.

## QAYBTA 11: Qaadashada Imtaxaanka Darawalka

### KOORSADA TABABARKA GAARI WADISTA EE DADKA WAAWAYN EE LASOO GAABSHAY - OAC 4501-8

Shaqsiyaadka ka wayn 18 sano ee ku fashilma imtaxaanka darawalka marka koowaad waa inay qaataan *Koorsada Tababarka Gaari Wadista ee Dadka waawayn ee lasoo Gaabshay*, ilaa inay qaateen maahee koorsada darawalnimada oo la aqoonsan yahay sanad gudihiis kahor imtaxaanka. Si aad u hesho bixiyaasha *Koorsada Tababarka Gaari Wadista ee Dadka waawayn ee lasoo Gaabshay*, booqo [Hel Dugsiga Darawalka](https://services.dps.ohio.gov/DETS/public/schools) (https://services.dps.ohio.gov/DETS/public/schools).

Cadaynta waxbarashada darawalka ee la aqoonsan yahay ayaa la keeni doonaa kahor intaan imtaxaanka lagu celin mar labaad. Waxaa jira afar dookh oo lagu heli karo in lagu qaaro *Koorsada Tababarka Gaari Wadista ee Dadka waawayn ee lasoo Gaabshay*:

- Casharka 4 saac ah ee tooska loo tagaayo oo ay xigaan 4 saacadood oo gaari wadista lagu tijaabinaayo (oo uu bixinaayo dugsiga ruqsada leh ee Tababarka Gaari Wadista ee Dadka waawayn ee lasoo Gaabshay).
- 4 saacadood oo casharka oonlaynka gobalku ogol yahay iyo 4 saacadood oo gaari wadista la tijaabinaayo (oo uu bixinaayo dugsiga ruqsada leh ee Tababarka Gaari Wadista ee Dadka waawayn ee lasoo Gaabshay).
- 4 saacadood oo cashar toos loo tagaayo ah iyo 24 saacadood oo gaari wadista ah uuna bixinaayo darawal ruqsad leh oo jira 21 ama ka wayn.
- Koorsada 4 saac ah ee oonlaynka ah iyo 24 saac oo gaari wadista ah oo uu bixinaayo darawal ruqsad leh oo jira 21 ama ka wayn.
  - Codsadayaasha doorta dookha 24 saac ee gaari wadista uu bixinaayo darawal ruqsad leh oo jira 21 ama ka wayn, ma dhamaysan karaan wax ka badan afar saacadood oo gaari wadista ah maalin kaliya.
  - Waxaa intaas dheer, codsadaayaasha doorta dookhaan ayaa laga doonayaa inay dhameeyaan [Cadaynta Afar iyo Labaatanka Saac](#) (foomka BMV 5789).

Kahor intaan mar labaad loo fariisan imtaxanaka darawalka, codsaduuhu waa inuu:

- Keenaa *Shahaadada Dhamaystirka Koorsada Tababarka Gaari Wadista ee Dadka waawayn ee lasoo Gaabshay*.
- Haddii ay qusayso, waa inuu keenaa [Cadaynta Afar iyo Labaatanka Saac](#) ee la buuxshay, oo nootaayo leh (foomka BMV 5789).

**QAYBTA 12: Iibso Ruqsadaada Darawalnimada****IIBSIGA RUQSADAADA DARAWALNIMADA**

**Waad Baastay!** Kadib marka aad ku baasto **labadaba** imtaxaannada xirfada wadada iyo aqoonta gaari wadista, booqo [Wakaalada Ku Xigeenka Diiwaan Hayaha Ruqsad Bixinta](#) si aad u iibsato Ruqsadaada Darawalka.

- Keen dukumiintiyadaan marka aad tagto Xafiiska ku xigeenka Diiwaan Hayaha:
  - Kaarka Aqoonsiga Ruqsada ku Meel gaarka ah (TIPIC)
  - Dukumiintiyada cadaynta aqoonsiga (arag [Liiska Dukumiintiyada la Ogol yahay](#))
  - Haddii uu jiro, [Cadaynta Afar iyo Labaatanka Saac](#) ee nootaayaysan (foomka BMV 5789) ee shaqsiyaadka jira 18 sano iyo ka wayn. (Nootaayooyinka ayaa laga heli karaa Wakaalada Kuxigeenka Diiwaan hayaha.)
  - Haddii codsaduhu ka yar yahay 18 sano jir,
    - ◆ Nuqulka nootaayaysan ee [Cadaynta Afar iyo Labaatanka Saac](#) (foomka BMV 5791),
    - ◆ Waalidka ama masuulka codsaduhu waa inay:
      - ▶ Keenaan aqoonsiga \*tusaale, Ruqsada Darawalka ama kaarka aqoonsiga), iyo
      - ▶ La saxiixaa Codsiga Ruqsada Darawalka ilmaha.
- [Waa inuu Khadka oonlaynka Kasoo galaa](#) kahor intuusan booqan [Ku xigeenka Wakaalada Diiwaan Hayaha Ruqsada](#).

**QAYBTA 12:**

- IIBSIGA RUQSADAADA DARAWALKA
- QAADASHA RUQSADAADA DARAWALKA
- CASHARADA RUQSADA DARAWALKA

**Masuuliyada Qayb Saxiixlaha**

Waalidka ama masuulka la saxeexa ilmaha codsiga liisanka waxay si wadajir ah uga masuul yahay waxyeelo kasta oo dayac keenay ama wax xun samayn marka la wado gaadhiga ilaa ilmuhu ka gudbayo sanadguuradiisa 18 jirka.

Haddii ilmuhu galo shil ku dhac baabuur, masuuliyada la saxeexaha waxaa meesha laga saari karaa haddii la iyadoo la metelayo ilmaha Xafiiska Gadiidka laga faylgareeyo cadayn masuuliyada maaliyadeed (fiiri Qaybta Lixeed - Masuuliyada Maaliyadeed).

Qofka la saxiixaaya codsada ayaa joojin kara ogolaanshaha ilmaha aan qaangaarin marka uu doono asagoo boostada kusoo diraa Ruqsada Darawalka ee ilmaha yar ama TIPIC, ama waraaqda nootaayada leh ee codsanaysa joojinta una diraa ciwaankaan.

OHIO BUREAU OF MOTOR VEHICLES  
ATTN: LICENSE CONTROL  
P.O. BOX 16521  
COLUMBUS, OHIO 43216

Ruqsada ama TIPIC ayaa la joojin doonaa, qofka qaybta ku leh saxiixana waxaa laga reebi doonaa masuuliyada uu kusoo rogay qodobka ORC 4507.07(B).



## QAYBTA 12: Iibso Ruqsadaada Darawalnimada

### Ruqsada Darawalka: Ku dhaqanka iyo Heerka caadiga ah

Dadka reer Ohio ayaa ikhtiyaar u haysa inay kala doortaan ruqsada Darawalka ee *Ku dhaqanka* iyo *Kaarka Ruqsada ee Caadiga ah* Dooro nooca kaarka sida ugu haboon kuugu shaqaynaaya:

#### KAARKA KU DHAQANKA



**Wuxuu buuxinayaa** shuruudaha amaanka socdaalka ee qaran. Foomka ku dhaqanka xeerka federaalka ee aqoonsiga ayaa loo baahan doonaa si loo raaco duulimaadyada ganacsiga ama si loo galo xarumaha federaalka ama saldhigyada militariga.

Qaadashada Kaarka Ku dhaqanka xeerka **ayaa u baahan dukumiintiyada aqoonsiga oo dheeraad ah** oo ka badan kuwa kaarka Caadiga ah. Waa inaad keentaa dukumiintiyada cadaynaaya:

- Magaca sharciga oo buuxa
- Taariikhda Dhalashada
- Lambarka Sooshiyal Sekuyuuratiga
- Ciwaanka Wadada Ohio - labo dukumiinti
- Muwaadinimada ama daganaanshaha sharci ee aad ku joogto Maraykanka.

#### KAARKA CAADIGA AH



**Ma buuxinaayo** shuruudaha amaanka socdaalka ee qaran. Kaarka caadiga ah ayaa u baahan in lala adeegsado baasaboorka ama dukumiintiyada kale ee la aqbali karo ee ay ogolaadeen Maamulka Amaanka Gaadiidka (TSA) si loo kaxeeyo gaadiid ganacsi ama loo galo xarun federaal ama saldhig ciidan. Fadlan booqo [www.tsa.gov/travel/security-screening/identification](http://www.tsa.gov/travel/security-screening/identification) si aad u hesho xog dheeraad ah.

Kaarka caadiga ah uma baahna dukumiintiyada dheeriga ah ee aqoonsiga, **ilaa in** kaarka ama Aqoonsiga Ruqsada Darawalka lasoo saarya markii koowaad maahee.

Waxaad heli doontaa ruqsadaada cusub ee darawalka ama kaarka aqoonsi oo laguugusoo dirayso boostada.

### Dukumiintiyada cadaynta aqoonsiga (arag – Liiska Dukumiintiyada la Ogot yahay

Codsadeyaasha TIPIC, nooc kasta oo Ruqsad Darawal ah, ama kaarka aqoonsiga gobalka waa inay marka hore keenaan dukumiintiyada la aqbali karo ee cadaynta aqoonsiga oo ay ku jiraan shan qaybood ee soo socota:

- Magaca sharciga oo buuxa
- Taariikhda Dhalashada
- Lambarka Sooshiyal Sekuyuuratiga
- Ciwaanka Wadada Ohio (Kaarka Waafaqida ayaa u baahan labo dukumiintiyada ciwaanka ah)
- Muwaadinimada ama daganaanshaha sharci ee aad ku joogto Maraykanka.

**Booqo webseedka BMV si aad u aragto**  
[Liiska Dukumiintiyada La Aqbali karo ee Kaarka Waafaqsan iyo kan Caadiga ah.](#)

## QAYBTA 12: Iibso Ruqsadaada Darawalnimada

### CUSBOONEYSIINTA RUQSADAADA DARAWALKA

**Waa masuuliyadaada inaad ogaato goorta uu dhacayo liisankaagu** Ohio waxay bixisaa cusbooneysiinta Ruqsada Darawalka oo oonlayn ah oo lagu baxsho [Adeegyada Oonlaynka ah ee BMV](#) lana siinaayo codsadeyaasha u qalma. Dhammaan codsadeyaasha ayaa u qalma inay cusbooneysiyaan Ruqsadooda Darawalnimada ayagoo toos u tagaaya midkood [Wakaalada Ku xigeenka Diiwaanka Ruqsada](#).

Haddii aad ka yar tahay 21 sano, Ruqsadaada darawalka ee Ohio ayaa dhacaysa marka aad gaarto dhalashadaada 21aad.

Waxaad dib u cusbooneysiisan kartaa ruqsada ilaa 30 maalmood kahor intaan la gaarin dhalashadaada 21aad. Codsadeyaasha u qalma ee jira 21 sano ama ka wayn laakiin aan wali gaarin 65 sano, ayaa haysta dookha iibsashada ruqsad 8 sano ah, haddii kale, ruqsad 4 sano ah ayaa la siin doonaa.

Ma jiro **waqti dheeri ah** oo dib loogu cusboonaysiinayo liisanka. Haddii aad sii wadato isticmaalka liisankaaga kadib marka uu dhaco, waxaad khatar u gelaysaa ganaaxa wadooyinka.

### CASHARADA RUQSADA DARAWALKA

#### Ruqsada Darawalka ee Heerka D

Ruqsada darawalka heerka D ayaa u sahlaya qofka, ayna ku jiraan darawalka ku meel gaarka ah ee kayar 18 sano jir, inuu wado gaari matoor ku shaqeeya oo aan u baahnayn ruqsada Darawalka Ganacsiga (CDL) ama aqoonsi dheeraad ah.

Darawallada cusub ee ka yar da'da 18 ayaa waajahaaya xanibaadahaan:

#### Inta lagu jiro 12 bilood ee ugu horeeya ee Qaadashada Ruqsada Darawalka:

- Darawalka ayaan ku shaqayn karin gaariga laga bilaabo **saqda dhexe ilaa 6 a.m.**, marka laga reebo:
  - Inuu la socdo waalid ama masuul.
  - Inuu u socdo ama ka imaanaayo shaqada, uuna haysto cadaynta kasoo baxday loo shaqeeyaha ([Foomka BMV 2825](#)),
  - Uu u wado ama ka imaanaayo munaasad dugsi oo rasmi ah ama munaasabad diimeed, uuna haysto dukumiintiga ku haboon oo kasoo baxay madaxda munaasabada ([Foomka BMV 2826](#)).
- Darawalka iyo dhammaan rakaabku waa inay xidhaan suumanka amaanka. Tirada dadka saaran gaariga ayaan ka badan karin tirada suumanka amaanka ee horay gaarigu u lahaa.
- Darawalka ayaan adeegsan karin **wax** aalad ah, ayna ku jiraan taleefannada, inta uu gaariga wado.
- Gelista danbiga taraafiga inta lagu jiro bilaha koowaad ee ruqsada ayaa keeni karta in waalid ama masuul sharci ah laga doono inuu la socdo darawalka muddo lix bilood ah, ama ilaa darawalku ka gaaro 17 sano jir.
- Darawalka ayaan wadi karin gaariga oo u saaran yahay wax ka badan hal xubin ka baxsan qoyska oo rakaab ah, ilaa inuu la socdo maahee waalid ama masuul.

#### Kadib 12 ka bilood ee ugu horeeya ee Haysashada Ruqsada Darawalka:

- Darawalka ayaan ku shaqayn karin gaariga laga bilaabo **1 a.m. ilaa 5 a.m.**, marka laga reebo:
  - Inuu la socdo waalid ama masuul.
  - Inuu u socdo ama ka imaanaayo shaqada, uuna haysto cadaynta kasoo baxday loo shaqeeyaha ([Foomka BMV 2825](#)),
  - Uu u wado ama ka imaanaayo munaasad dugsi oo rasmi ah ama munaasabad diimeed, uuna haysto dukumiintiga ku haboon oo kasoo baxay madaxda munaasabada ([Foomka BMV 2826](#)).
- Darawalka iyo dhammaan rakaabku waa inay xidhaan suumanka amaanka. Tirada dadka saaran gaariga ayaan ka badan karin tirada suumanka amaanka ee horay gaarigu u lahaa.
- Darawalka ayaan adeegsan karin **wax** aalad ah, ayna ku jiraan taleefannada, inta uu gaariga wado.
- Xukunnada kaladuwan ee danbiyada wadada kahor intaan darawalku gaarin 18 sano ayaa keeni kara 90 maalmood oo laga xanibo ruqsada.
- Xukunnada la xariira khamriga, Ruqsada Darawalka ayaa la hakin doonaa ugu yarana lix bilood sida ku cad ORC 4511.19.

## QAYBTA 12: Iibso Ruqsadaada Darawalnimada

### Ruqsada Darawalka Ganacsiga (CDL)

CDL ayaa looga baahan yahay darawallada gaariyaasha lagu qeexay heerarka hoose, ilaa in darawalku u qalmo maahee shardi dhaaf.

**Heerka A** – Isku dhaf gaadiid oo isku darka culayskoodu yahay 26,001 bownd amaka badan haddii miisaanka gaadhiga ama gaawaadhiga la jiidayaa ay ka badan yihiin 10,000 oo bownd.

**Heerka B** – Gaadhi kasta oo kali ah oo culayskiisu yahay 26,001 bownd ama ka badan oo gaadhi noocan ah oo jiidaya gaadhi aanu culayskiisu ka badnayn 10,000 bownd.

**Heerka C** – Gaari kasta oo keli ah ama isku darka gaariyaasha aan loo aqoonsan Heerka A ama Heerka B iyo mid kasta oo kamid ah ama ka badan kuwa soo socda:

- Loogu talagalay inuu qaado 16 rakaab ah ama ka badan, uuna ku jiro darawalka.
- Qaadaaya waxyaabo khatar ah oo dhan cadad u baahan digniin.
- Bas iskuul kasta oo culayskiisu ka yar yahay 26,001 bownd kaas oo loogu talagalay inuu qaado wax ka yar 16 rakaab ah oo uu ku jiro darawalku.

**Si aad u hesho Xog dheeraad ah oo ku saabsan Ruqsada Darawalka Ganacsiga, fadlan booqo [Buugga Tasmada Ruqsada Darawalka Ganacsiga ee Ohio.](#)**

### Ruqsada ama Aqoonsiga Mootada, Iskuutar matoor leh, ama Moped

**Mopeds** — Dadka jira 14 sano ama ka wayn ayaa codsan kara ruqsada moped. Ruqsada mootada looma baahna haddii Ruqsada Darawalka horay qofku u haystay.

- Codsadeyaasha waa inay buuxshaan heerarka araga ayna ku baasaan imtaxaanka aqoonta iyo tijaabada wadada si ay u qaataan ruqsada mootada.
- Imtaxaanka aqoonta mootada ayaa u adeegsada labada qaybood ee ugu horeeya imtaxaanka labada taayir ee mootada (1 - Hal Gacan Haatin, Joogsi Caadi ah iyo 2 - Kasoo leexashada Joogsiga, Leexashada kala wareegga ah \*U)). Ka fiiri [Tasmada Darawalka Mootada](#) si aad u hesho xogta iyo sawirada imtaxaanka.
- Dadka haysta ruqsada ku meel gaarka ah ee mootada ee jira 14 ilaa 15 ayaa haysta wadista mudada kooban ee xiliga maalintii.

Mootada **ama baaskiilka matoorka leh** ayaa u baahan **ruqsada** mootada ama ruqsada **Heerka D** si loo wado, iyo in lagu aqoonsado sifooyinka soo socda:

- Labo taayir, ama hal taayir hore iyo labo danbe
- Waa la sheelarayn karaa
- Waxaa ku xiran matoorka caawinta
  - Aan ka badnayn 50 cc
  - Aanu soo saarin wax ka badan biriig awoodiisu tahay hal hooras baawar (horsepower)
  - Waxay awood u leeyihiin inay gaariga kiciyaan ugu badnaan 20 mph dhulka dushiisa

## QAYBTA 12: Iibso Ruqsadaada Darawalnimada

**Mootooyinka iyo Iskuutarada** — Qof kasta oo ku shaqaynaaya mooto (si loogu daro 2 taayir-leey, 3 taayir-leey, iyo taayirada daboolan) ama iskuutar matoor ah oo maraaya wadooyinka dadwaynaha ee Ohio waa inuu haystaa ruqsada wadista mootada/iskuutarka ama aqoonsiga. Darawalka ayaa codsan kara ruqsada mootada keliya ama ku dari kara aqoonsiga dheeriga ah ee mootada ilaa Ruqsada saxda ah ee Darawalka Ohio.

- Qofka wata oggolaanshaha mootada laba taayirka ee motorka leh ama ruqsad waxaa laga yaabaa inuu kaxeeyo mooto laba ama saddex-shaag ah iyo iskuutar.
- Qofka haysta oggolaanshaha mootada saddex taayir leh ama ruqsadku eg wadista mootada saddex taayir leh.
- Ruqsada iskuutarka mootada ah ama ruqsad laha ayaa ku xadidan inuu wado iskuutar matoor leh keliya.

Iskuutar **matoor leh** ama **iskuutar matoor ku shaqeeya** ayaa u baahan **ruqsada iskuutarka** ama **mootada** ama **aqoonsiga** si uu u wado, waxayna leeyihiin sifooyinka soo socda:

- Waxaa loo sameeyay inay ku socoto ugu badnaan sadex taayir ayna dhulka ku socoto
- Kursiga darawalka iyo rakada cagaha darawalka
- Waxaa ku xiran matoor u dhexeeya 50 cc iyo 100 cc oo:
  - soo saara ugu badnaan shan awoodaha bareega ah
  - Waxay awood u leeyihiin inay gaariga kiciyaan ugu badnaan 20 mph dhulka dushiisa

Mooto **ayaa** baahan **ruqsada** ama **aqoonsiga** wadista mootada si loo wado, waxay leedahay sifooyinka soo socda:

- Gaari matoor leh oo awood socod leh
- Kursiga darawalka iyo meesha uu cagaha saarto
- Waxaa loo sameeyay inay ku socoto ugu badnaan sadex taayir ayna dhulka ku socoto
- Dusha aan qof kale la fuuli karin ama dul qof kale la fuuli karo oo uu xiri karo ama furi karo darawalku

**Barnaamijka Mootada ee Ohio** — Waaxda Ohio ee Badbaadada Dadwaynaha ee barnaamijka Mootada ee Ohio waa barnaamij bixiya kooras badbaadsanaanta mootooyinka iyo aqoontooda ah kana baxa goobo badan oo ka tirsan gobolka. Barnaamijka Mootada ee Ohio waxaa looga baahan yahay dadka da'doodu tahay 18 jir ka hor inta aanay codsan oggolaanshaha wadaha mootada ama/iyo liisan. Waxaa intaas dheer, shaqsiyaadka kayar 18 sano wali waa inay buuxshaan shuruudaha Qalin Jabinta Ruqsada Darawalka kahor intaan la siin aqoonsiga dheeriga ah ee mootada.

**Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku aadan ku wadista mooto gudaha Ohio booqo oo arag [Buugga Tasmada Wadaha Mootada.](#)**

**QAYBTA 13: Maxaa Kale oo ay Tahay Inaan Ogaado?****DADKA CUSUB EE SOO DEGAAYA OHIO**

Gobalka Ohio, marka aad shaqo hesho, aad saxiixdo heshiis kiro, iibsato guri, ama aad ilmaha dugsi gaysato, waxaad tahay qof deegaanka ah.

- 30 maalmood gudahood marka aad daganaanshaha hesho, darawallada Ohio waa inay haystaan Ruqsada Darawalka ee Ohio.
- Haddii aad leedahay gaari, waa in la siiyaa shahaadada Ohio bixiso ee ruqsada iyo diiwaan gelinta. Marka aad gaariga diiwangeliso, taarikooyinka ay Ohio bixiso iyo calaamada diiwaangelinta ayaa lagu siinayaa.

*Si aad u hesho xog faahfaahsan, booqo [bogga Dadka ku cusub Ohio ee webseedka BMV](#).*

**SANDUUQA BADBAADI ARAGEENA**

Marka dadka Ohio codsadaan ama dib u cusbooneysiistaan diiwaangelinta gaarigooda, waxaa laga codsan doona haddii ay ku deeqi karaan \$1 si loo daro *Sanduuqa Badbaadi Arageena*.

Ujeedada [Barnaamijka Sanduuqa Badbaadi Arageena](#) waa in la xaqiijiyo in carruurta Ohio ay helaan caafimaadka araga iyo indhaha oo wanaagsan. Barnaamijkaan waxaa lagu gaarayaa hanaanka deeqda diyaarsan. Dadka deeqdaan helaaya ayaa adeegyada araga ka bixin doona dhammaan ismaamullada gobalka oo dhan.

**SANDUUQA DIIWAANKA KU DEEQIDA XUBNAHA JIRKA IYO FURSAD LABAAD**

Sharciga Ohio ayaa u sahlaaya codsadeyaasha TIPIC, Ruqsada Darawalka, Kaarka aqoonsiga, iyo diiwaan gelinta gaariga inay si iskood ah isku qoraan inay ku deeqaan xubin, il, iyo xubnaha jirka ee Diiwaanka Ohio ee Deeqaha Xubnaha Jirka. Xiliga bixinta, dadka reer Ohio ayaa la waydiin doonaa haddii ay doonayaan in loo diwaan gasho ku deeqaha xubinta, isha, iyo cadka. Marka shahaadada Ohio la baxsho, erayga "XUBIN KU DEEQE" ayaa lagu qoraa kaarka. Sidoo kale waxaad oonlayn ahaan iskaga diiwaan gelin kartaa webseedka [Donate Life Ohio](#) ama [Adeegyada Oonlaynka BMV](#).

Deeqda ikhtiyaariga ah ee Sanduuqa Maaliyada Fursada Labaad ee Ohio ayaa taageeraaya waxbarashada ku deeqida xubnaha, indhaha, iyo xubin.

**DIIWAAN GELINTA CODBIXIYAHA**

Dhammaan Codsadeyaasha Ruqsada Darawalka iyo kaarka aqoonsiga ee u qalma ayaa laga codsan doonaa haddii ay iska diiwaan gelin karaan cod bixinta ama isbadelka xaaladooda codbixinta. Aqoonsiga codbixiyaha ayaa laga badeli karaa [Wakaalada Ku xigeenka Diiwaanka Ruqsada](#) adoo buuxinaaya foomka Diiwaan gelinta Codbixiyaha/Isbadelka Ciwaanka. Ku xigeenka Diiwaanka ayaa u diraaya foomamka cod bixinta ee la buuxshay Gudiga Doorashooyinka ee Ismaamulka.

**KAARKA AQOONSIGA ILMAHA**

Kaarka aqoonsiga sawirka leh ee Ohio ee carruurta ayaa ka caawinaaya maamulka marka ilmo uu lumo ama lasoo sheego inuu dhumay. Kaarka aqoonsiga ee Ohio waxaa loogu talagalay aqoonsi uun keliya, loomana adeegsan karo wax kale, ayna ku jiraan faa'iidooyinka darawalnimada.

Waxaad codsan kartaa kaarka aqoonsiga ee cunugaaga adoo tagaaya mid kamid ah [Wakaalada Ku xigeenka Diiwaanka Ruqsada](#) kadibna u gaynaaya dukumiintiyada aqoonsiga oo ku jira [Liiska Dukumiintiyada la aqbali karo](#). Booqo webseedka BMV si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan [ol-olaha aqoonsi siinta Ubadka](#).

**QAYBTA 13:**

- DADKA KU CUSUB OHIO
- SANDUUQA BADBAADI ARAGEENA
- SANDUUQA DIIWAANKA KU DEEQIDA XUBNAHA JIRKA/SANDUUQA FURSADA LABAAD
- DIIWAAN GELINTA CODBIXIYAHA
- KAARKA AQOONSIGA ILMAHA
- QOFKA XIGA EE MASUULKA KA AH - XOGTA XARIIRKA XAALADA DEGDEGA AH
- BIXINTA DARDAARANKA NOOL EE DHAXALKA
- AQOONSIGA CIIDANKA QALABKA SIDA.

## QAYBTA 13: Maxaa Kale oo ay Tahay Inaan Ogaado?

### QOFKA XIGA EE MASUULKA KAA NOQON KARA – XIRIIRKA XAALAD DEGDEG AH

Ayadoo la adeegsanaayo *barnaamijka Qofka xiga ee masuulka ka ah Xogta Xariirka Xaalada Degdega ah*, dadka Ohio ayaa aqoonsan kara ilaa labo qof oo lala xariiraayo marka xaalad degdeg ah jirto si booliisku ugu sheegaan marka shil ama xaalad degdeg ah ay ka dhigto qof mid aan la xariiri karin booliiska ama shaqaalaha gurmada caafimaadka. Waalidiinta ubadka haysta kaarka aqoonsiga Ohio ayaa ku dari kara xogta xariirka diiwaanka ilmahooda si loogu adeegsado marka ilmuhu lumo ama lasoo sheego inuu maqan yahay.

Kudar xogta xariirka xaalada degdega ah diiwaanka darawalkaaga ama diiwaanka kaarka aqoonsiga.

- Oonlaynka: [Adeegyada Oonlaynka ee BMV.](#)
- Si toos ah: Wakaalad kasta oo ah [Ku xigeenka Diiwaanka Ruqsada](#)
- Boostada: Adeegyada Xaqiijinta ee BMV  
Maaraynta dukumiintiga  
P.O. Box 16520  
Columbus, OH 43216-6520



### DARDAARANKA DHAXALKA EE QOFKA NOOL

Codsadeyaasha Ruqsada darawalka iyo kaarka Aqoonsiga ayaa la waydiin doonaa haddii ay doonayaan in Ruqsadooda Darawalka ama kaarka aqoonsiga lagu sheegay inay fulinayaan awooda wakiilka sharciga ah ee caafimaadka ama shaacinta adeegsiga qalabka xakamaynta noloshu. Astaynta ayaa ka muuqan doonta dhabarka danbe ee Ruqsada darawalka ama Kaarka Aqoonsiga.

### AQOONSIGA CIIDANKA QALABKA SIDA

Qof kasta oo ciidanka soo maray, hadda shaqeeya, ama kayd u ah ciiwanka qalabka sida ee Maraykanka ayaa lahaan kara aqoonsiga "CIIDANKA QALABKA SIDA" oo lagu muujiyo ruqsada Darawalka ama kaarka Aqoonsiga.

Codsadeyaasha ayaa booqan kara mid uun [Xafiisyada Ku xigeenka Diiwaanka Ruqsada](#) kadibna u gayn kara Ruqsada darawalka ama Kaarka aqoonsiga iyo mid kamid ah dukumiintiyada hoose:

- Kaarka aqoonsiga Ciidanka hawlgabka ah ama Shaqeeya
- Kaarka Aqoonsiga Halyeeyada Ciidanka
- Warbxinta Shaqada Ciidanka ee socota – Foomka DD 220
- Cadaynta Ka fasixida ama Ka saarida Shaqada Ciidanka - Foomka DD 214

